DOWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

GARYAQAANKA GUUD EE PUNTLAND

# XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE PUNTLAND

## SOLICITOR GENERAL OFFICE

## مكتب المحامي العام للدولة

## WAAXDA FAAFINTA RASMIGA AH

# SHARCIGA WAX-KA-BADALKA XEERKA CANSHUURAHA DOWLADDA PUNTLAND

## FAAFINTA RASMIGA AH

## OFFICIAL GAZAETTE

## الجريدة الرسمية

---

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Puntland, Address: Madaxtooyada Puntland, Garowe
Email:gg.pl@plstate.so

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 19AAD | CADADKA 12AAD | TAARIIKH: 24/12/2019 | Lam. 10 |
|---|---|---|---|

# FAAFINTA RASMIGA AH

# OFFICIAL GAZETTE

# الجريدة الرسمية

## SHARCIGA WAX-KA-BADALKA XEERKA CANSHUURAHA DOWLADDA PUNTLAND

## TUSMADA


| | |
|---|---|
| **Qeybta 1aad** | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Ansixinta Wax-ka-badalka Xeerka Canshuuraha Dowladda Puntland** |
| **Qeybta 2aad** | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 3aad** | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 4aad** | Go'aanada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br>WAXBA MALEH |
| **Qeybta 5aad** | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br>WAXBA MALEH |


GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR PUNTLAND
المحامي العام للدولة

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Sharci Lr. 7 ee December 24, 2019, kuna saabsan Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeerka Canshuuraha Dowladda Puntland.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland.**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80[aad]

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/151/2019, kuna taariikhaysan 16/12/2019.

**Markuu tixgeliyey:** Baahida loo qabo wax-ka-bedelka Xeerka Canshuuraha Qadobkiisa 2.1.1 Farqadiisa2.1.6 ee Xeerka Canshuuraha Dowladda Puntland.

**<u>Wuxuu soo saaray</u>**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1[aad]**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen wax-ka-bedelka **Qadobka 2.1.1** Farqadiisa **2.1.6** ee Xeerka Canshuuraha Dowladda Puntland.

**Qodobka 2[aad]**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda Puntland.

**Qodobka 3[aad]**

Dhaqan-gal Sharcigan wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland.

**Dr. Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**
**GOLAHA WAKIILADA**

**ولاية بو نت لاند الصومال**

**مجلس النواب**

**Xafiiska Guddoomiyaha**
**Office of the Speaker**

***Tix:-*XGGW/DPL/151 /2019 Garoowe, Isniin Taariikh:- 16/12/2019**

**Ku: Madaxweynaha Dawladda Puntland** **Garoowe**

**Ujeeddo:- Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeerka Canshuuraha DPL**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU:-**

**MARKUU ARKAY:-** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa **64**-aad

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta Madaxweynaha Ref:MW/DPS/2019 ee August 08 2019,kuna saabsan Ansixinta wax ka-bedelka Xeerka Canshuuraha Dawladda Puntland ( Xeer Lr 3) ee 2014.

**MARKUU TIX-GELIYEY:-** Baahida loo qabo Ansixinta wax-ka-bedelka Qododka 2.1.1 Farqadiisa 2.1.6 ee Xeerka Canshuuraha Dawladda Puntland.

**MARKUU ARKAY:-** Dooddii iyo go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey kalfadhiga 45-aad fadhigiisii 13-aad ee 19/11/2019,wax-ka-bedelka xeerka canshuuraha Dawladda Puntland.

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Wax-ka- bedelka Qodobka 2.1.1 Farqadiisa 2.1.6 ee Xeerka Canshuuraha Dawladda Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Abwaan Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND ★ OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

**ولاية بو نت لاند الصومال**

**GOLAHA WAKIILLADA**

**مجلس النواب**

# WAX-KA-BEDELKA XEERKA CASHUURAHA DAWLADDA PUNTLAND

---

**Garoowe, Noveember, 2019**

# TUSMADA BUUGGA

FAAFINTA RASMIGA ..... 2
Saxiixa Madaxweynaha ..... 3
Saxiixa Guddoomiyaha ..... 4
TUSMADA BUUGGA ..... 5
Gogol dhig (Foreword), Minister of Finance of Puntlanc_ Somalia ..... 7
Soo koobida Fulinta ..... 9
1.1 Maxaynu u bixinnaa Cashuuraha? ..... 13
1.2 Mabaadi'da iyo Fikradaha asaaska u ah Cashuuraha ..... 14
2. CUTUB 2 Noocyada Cashuuraha Puntland ..... 15
2.1 Cashuuraha Berigga ..... 16
2.1.1 Cashuurta Toosan ..... 17
2.1.2 Cashuurta Dakhliga ..... 18
2.1.3 Ujeedada Cashuurta dakhliga ..... 18
2.1.4 Sidee u shaqaysaa Cashuurta Dakhligu? ..... 18
2.1.5 Noocyada Cashuurta Dakhliga ..... 18
2.1.6 Dakhliga ka yimaada Shaqada ..... 20
2.1.7 Dakhliga ka yimaada Ganacsiga (wax kala iibsi, wershedayn, beer) iyo Xirfad ..... 22
2.1.8 Cashuurta dakhliga shirkadaha ..... 22
2.1.9 Cashuurta dakhliga ka yimaada dhismaha ..... 22
2.1.10 Boqoleyda Cashuurta dakhliga ..... 23
2.2.2 Dakhliga sida joogtada ah looga dhaafay Cashuurta ..... 26
2.3 Cashuurta Dadban ..... 27
2.3.1 Cashuuraha Diiwaangelinta ..... 28
2.3.2 Cashuuraha Boolada ..... 30
2.3.3 Cashuurta Gadida ..... 31
2.3.4 Cashuurta wada marista baabuurta (Vehicle Road tax) ..... 35
2.3.5 Cashuurta Wax soo saarka gudaha ..... 38
2.3.6 Ujuurada Maxkamadaha ..... 39
3.2.1 Qaybaha Badeecadaha ..... 46

**Liiska Tabeelayaasha**

**Tabeele 1** Shaxda Boqoleyda Cashuuraha Dakhliga

**Tabeele 2** Boqoleyda Cashuurta Diiwaagelinta

**Tabeele 3** Boqoleyda cashuurta Boolada

**Tabeele 4** Boqoleyda cashuurta gadida

**Tabeele 5** Boqoleyda cashuurta wada marista


**Tabeele 6** Boqoleyda Cashuurta wax soo saarka gudaha

**Liiska Jaantusyada**

Jaantuska 1: Isbedeladda Dakhliga Cashuurta

Jaantus 2: Inta uu ka kooban yahay dakhliga dowladda

## Gogol dhig (Foreword), Minister of Finance of Puntland_ Somalia



Waxaa farxad ii ah inaan idiin soo gudbiyo buuggaan la yiraahdo Buuga Qaab Dhismeedka Cashuuraha Dawladda Puntland,( Puntland Taxation Framework) oo aan horay uga jirin Puntland. Buugani wuxuu sawir guud ka bixinayaa canshuuraha ay qaado dawladda Puntland kuwaasoo kala ah; Cashuuraha Berriga iyo Cashuuraha furdada oo ah kuwa dakhliga ugu badani ka soo galo dawladda Puntland.

Waxaan rajanayaa in ay fursad u noqoto cid kasta oo daneeynaysa sida ; Hayadaha dawladda , Haya'daha Caalamiga ganacsatada iyo bulshada rayidka ah iyo sidoo kale cid kasta oo rabta inay maal gashi ku samaysato dalka kuwaasoo markii ay akhrisataan ay ka heli doonaan arrimo farax galiya oo ku saabsan danahooda kuwaasoo ah qiimayaal jaban (Low tariff) oo ay leeyihiin cashuuraha berriga iyo cashuuraha furdada. Waxaa kaloo sii dheer in habka furdada wax looga saaro uu yahay mid aad u dheereeya **(Custom Clearance Process)** oo ganacsaduhu uu muddo aad u yar kula baxayo alaabtiisa.Waxaa kaloo ayaduna buugga ku arki doontaan boqolayda dakhliga oo laga qaado faa'iidada laga helo ganacsiga, xirfadaha , warshadaha oo ah mid aad u yar oo aan isleenahay waa ay soo jiidanaysaa cidii rabta in ay dalka ka ganacsato.

Sida aad la socotaan Puntland waxay leedahay dekaddo wax ka soo dagaan waxna ka dhoofaan, kuwaasoo aad ugu dhow dalalka khaliijka, Yamen, DJabuti , oo laga keeno badeecadaha yimaada dalka Somalia ,kuwaasoo fursad u haysta in ganacsidgooda lagaga iibsado dalka Somalia iyo dalalka dariska oo ay uga sii gudbi karto.

Wasaarada Maaliyadu waxay mahad balaaran u celinaysaa qorayaashii Buugaan, Mudane. Cusmaan Maxamuud Ali, Axmed Maxamed Nur, oo la taliyayaal farsamo u ah Xisaabiyaha Guud iyo Xafiiska Hantidhawraha Guud iyo dhamaystirha buugaan Mudane. Abdulkadir Ahmed Hashi oo ah lataliye Farsamo Cashuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda . Waxaan isagana mahad u celinaynaa Cusmaan Xaaji Mire oo la taliye Cashuureed u ah Wasaarada Maaliyada oo isagu na siiyey xogta rasmiga ah iyo siduu ahaan jirey nidaamkii Cashuuraha ee Soomalia. Waxaa kaloo iyaguna mahad naga mudane Siciid Ismaaciil Siciid iyo Cabdiwaaxid Faarax oo ah Xisaabiyayaal Khibrad badan leh kana tirsan xafiiska Xisaabiyaha Guud oo nasiiyey Jaantuska taariikhiga ah ee Cashuuraha nagana caawiyey soo

bandhigistooda. Waxaa kaloo isaguna mahad mudan Abshir Maxamed Abshir oo isaguna dib u eegis la fahmi karo ku sameeyey Buugga.

Wasaarada Maaliyadu waxay kaloo mahadnaq balaaran u fidinaysaa Gudigii Cashuureed ee ka socdey Wasaaradda Maaliyada oo uu madax ka ahaa Agaasimaha Guud ee Cashuuraha Berriga Mr Ali Jama Gashan oo iyagu ka qaybqaadasho xirfadeed oo balaaran ku sameeyey Buuga iyo casriyayn ah sidii kor loogu qaadi lahaa qaab dhismeedka Cashuuraha.

Haddaba; waxaa rajanayaa inaad buggaan ka heli doontaan oo muddo aad ah looga sugayay Wasaaradda Maaliyadda ee Puntland

Wabilahi towfiiq

**Shire Xaaji Faarax**
**Wasiirka Wasaaradda Maaliyada, Puntland**

## Soo koobida Fulinta

Buugaan waxaa la isku deyey in uu kala dhigdhigo nidaamka Cashuuraha adag ee dawlada Puntland una sahlo cid kasta oo isticmaali karta sida dadka caadiga ah, dadka dawlad wax ka dhexeeyaan iyo dadka kale oo caalamka ka socda oo iyagu danaynaya. Buugani wuxuu ka hadlayaa qorshe arimo kala duwan oo ku saabsan shuruucda Cashuuraha, ujeedooyinkooda, wixii laga bedelay, kala duwanaanshohooda iyo sida loo maamulo.

Cashuurtu waa il fure u ah Dakhliga dal kasta isticmaalo si loo bixiyo adeega dawladu u qabanayso dadkeeda, Puntlandna kama duwana. Tobankii sano oo u danbeysey shaqada Cashuurta Puntland waxay u hormartay si lacag bixinteedu aad uyartahay, kororkuna wuxuu ahaa 21% sanadkii 2011 marka la barbardhigo sanadkii ka horeeyey iyo 8% sanadkii 2012, taasoo awood u siisay dawlada in ay guud ahaan bixiso miisaaniyada.

Muhimadeeda darteed , ka hadalka siyaasada Cashuurta iyo go'aangaariduba waxay ku keentaa arin xasaasi ah dadweynaha, ganacsatada iyo dhaqaalahaba iyadoo lala xiriirinayo saamaynta kala duwan oo ay ku yeelan karto midkasta oo ka mida qaybahaas. Sidaa darteed qorshaha habka shaqada nidaamka Cashuuraha wuxuu saamayn karaa sinaan la'aan, waana doorka dawlada in ay xaqiijiso sidii lagu wadi lahaa nidaam Cashuureed oo cadaalad ku salaysan oo si siman loo qaybiyo dakhliga iyo waxa dadka lagu kaalmeeyo.

Nidaamka Cashuureed ee Puntland, Shuruucda iyo Xeerarkuba waa kuwo laga dhaxlay dawladdii hore ee Soomaaliyeed markii ay xoriyada qaadatay 1960kii, wax yar ayay isbedel ku sameeyeen Dawladihii isku xigxigey ee maamulka Puntland soo qabtay. Iyadoo la raacayo Dastuurka, Dawlada Qaranku waxay leedahay awood ay ku waajibiso labada Cashuurood, Cashuurta toosan oo ay ka mid tahay Cashuurta Dakhligu iyo Cashuuraha dadban oo la kala yiraahdo, Cashuurta qiimaha raacda (VAT), Cashuurta wax soo saarka gudaha iyo Cashuurta Furdada IWM.

Marka la isu geeyo Dakhliga Cashuuraha oo ay ururiso Dawladu, kan ugu weyn oo wax laga helo waa Cashuurta Furdada oo iyadu ahayd 63% sanadkii 2012, waxaa iyaguna soo raaca Cashuuraha Berigga oo noqday 12% oo ay ka mid tahay Cashuurta Gadida kuwaas oo marka la barbar dhigo Kenya ay Cashuurta Dakhligu gaartay 40% oo iyadu ah tan nisbadeedu ugu badantahay Dakhliga soo gala Dawlada, waxaa iyana u raaca 28% oo ah Cashuurta qiimaha raacda (VAT). Dawlada Puntland waxay sanadihii ay jirtey danaynaysey in ay kordhiso Dakhligeeda, waxayna tijaabooyin badan ka samaysay dhinaca Cashuuraha Berigga si ay kor ugu qaado ururinta Cashuurta Dakhliga, Cashuurta Gadida, Cashuurta Wax soo saarka gudaha iyo Cashuurta hantid maguurtada, iyo sidoo kale in Furdada loo dhaqaajiyo nidaamka Cashuurta qiimaha ku salaysan (Ad valorem) oo ay ogolaatay Hay'adda Furdooyinka

Caalamiga (WCO) iyadoo Cashuurta lagu salaynayo qiimaha Qaansheegadka , natiijadaas oo ay ka dhalanayso fursad balaaran oo lagu kordhin karo dakhliga Puntland.

Cashuurtu waxay saamayn ku leedahay dakhliga , sicirka badeecadaha iyo adeega, shakhsiyaadka iyo ganacsataduba siyaabo kala duwan uga falceliyaan iyadoo jawaabtu tahay in la bedelo dakhliga iyo sicirada la xiriira. Waxyaabaha ka soo burqanaya arimaha Cashuuraha waxay mudo badan u muuqanayeen mawduuc adag oo ay si balaaran ugu kala tageen khuburada Cashuuruhu. Fahamkaasi wuxuu qayb ka qaadanayaa war badan oo ka maqan arimaha ku saabsan siyaasada Cashuurta Dakhliga, maamulka Cashuuraha iyo shaqada Cashuuraha gaaraysa dadweynaha. Buugakan, sidoo kale wuxuu raadinayaa in uu buuxiyo waxa maqan isagoo isticmaalaya qaab fudud oo akhristaha ka caawinaya;

a) In uu fahmo sida Cashuurahaas kala duwan loo dejiyey
b) Inuu kala saaro noocyada kala duwan ee Cashuuraha
c) In uu fahmo sida Cashuurahaas loo maamulo iyo isbedelka ku dhacay nidaamka Cashuuraha sanadihii badnaa.

Waxaan rajeynayaa in Buugani faaiido weyn u yeesho dadka farsamo yaqaanada ku ah Cashuurta, Khuburada Cashuuraha, Bulshada Rayadka ah iyo dadweynaha guud oo iyagu sugaya in ay aad ugu lug yeeshaan ka hadalka iyo doodaha Cashuuraha iyo in ay ka qayb qaataan Cashuurta iyo go'aanada siyaasada dakhliga.

Qaybta labaad waxay ka hadlaysaa sababaha aynu u bixinno Cashuurta, mabaadi'da iyo fikradaha saldhiga u ah Cashuuraha. Tan waxaa iyaguna raaca qaybaha ay u kala baxdo Cashuurtu iyo qaabka Cashuurta Puntland.

Qaybta ugu danbaysana waxaa lagu eegayaa madaxyada Cashuureed ee kala duwan oo ka jira Puntland.

## CUTUB 1 Hordhaca

Dawladaha kuwa horumaray iyo kuwa hadda horay umarayaba waxay ururiyaan Cashuur si ay ugu bixiyaan adeega bulshada. Marina et al. (2002), wuxuu ku dooday in Cashuurtu tahay tan keliya oo lagu yaqaan hab dhaqanka lagu ururiyo dhaqaalaha si loogu bixiyo kharashka dawlada oo uu si badeeco iyo adeega ah u isticmaalay muwaadin kasta. Si kastaba ha ahaatee taasu maaha mid sax ah, dalalka hadda horay umaraya gaar ahaan waxay dakhli uga helaan si gaar ah ilo kale oo dhinac socda Cashuuraha, oo ay ka mid yihiin Cashuurta aan dakhliga ahayn sida ujuurooyinka iyo ruqsooyinka ay adeega u aqaadan wasaaradaha, waaxyaha iyo wakaaladaha iyo sidoo kale dakhliga ka yimaada iibka hantida dawlada iyo kuwa gaarka loo leeyahay.

Taas waxaa dheer dalal badan oo horay u maraya waxay ku tiirsan yihiin macaawino dibadeed oo ah ilo dakhli oo dibadeed (Barnett and Grown). Dawladuhu waxay u baahanyihiin in ay hor mariyaan siyaasada Cashuurta iyo nidaam Cashuureed oo ay hogaaminayaan mabaadi'da qaarkood. Markii ay Cashuurtu saamayso dakhliga iyo sicirada badeecadaha iyo adeega, shakhsiyaadka iyo ganacsatadaba waxay siyaabo kala duwan uga falceliyaan iyadoo jawaabtu tahay in la bedelo dakhliga iyo sicirada la xiriira oo ka soo burqanaya Cashuuraha. Sidaa darteed falaqaynta saamaynta siyaasada Cashuurtu waa arin xasaasi ku ah go'aan gaarista dawlada iyo in dadweynuhu yihiin kuwa ka warqaba go'aanada siyaasada.

Arimaha Cashuuruhu waxay mudo dheer ahaayeen kuwo u muuqda mawduuc adag oo ay si balaaran ugu kala tageen khuburada Cashuuraha. Fahankani wuxuu ka qayb qaadanayaa warar badan oo ka maran arimaha siyaasada Cashuuraha, maamulka Cashuuraha iyo shaqada Cashuurta gaaraysa dadweynaha. Buugani, waa mid waxa ku qoran aan laga heli Karin kuwa isaga la mid ah tobankii sano oo la soo dhaafay, sidaas darteed wuxuu raadinayaa in uu buuxiyo waxa maqan isagoo isticmaalaya qaab fudud si uu u caawiyo akhristayaasha in ay si fiican u fahmaan qaab dhismeedka Cashuureed ee hadda ka jira dalka. Waxaan rajeyneynaa in Buugani faaiido u yeesho bulshada rayadka ah iyo dhammaan dadweynaha danaynaya in ay si aad ah ugu lug yeeshaan dooda iyo ka hadalka Cashuurta iyo ka qayb qaadashada go'aannada siyaasada dakhliga iyo Cashuuraha.

Kan akhriya qoraalkaan wuxuu arkayaa in badidood qiimayaasha lacagta la isticmaalay ay yihiin kuwo la xiriira markii sharciyada la gudbiyey oo aan la isticmaali Karin waqtigaan la joogo illaa sharciyada dib loo eego ama la casriyeeyo. Si kasta ha ahaatee, kuwo badan oo muhim ah kana mid ah Cashuuraha toosan iyo Cashuuraha dadban waxay ku salaysanyihiin boqoley, welina waa la isticmaalaa, kuwaas iyaga ah waxaa loo isticmaali karaa hagid wanaagsan waxa hadeer la qaado.

Qaybta xigta waxay ka hadlaysaa sababaha aynu u bixino Cashuuraha iyo fikradaha iyo mabaadi'da saldhiga u ah Cashuuraha. Kan waxaa isna la socda qaabka Cashuuraha Puntland.

## 1.1 Maxaynu u bixinnaa Cashuuraha?

Dawladu waxay siisaa adeegyo kala duwan dadkeeda, oo ay ka mid yihiin waxbarasho, caafimaad, biyo, amni, jidad iyo kuwo la mid ah. Si loo bixiyo alaabada dadwayanaha iyo adeegyada, dawladu waxay si aan kala har lahayn u isticmaashaa Cashuurta iyo ilaha kale ee dakhliga sidii horay loo sheegay. Sidaa awgeed Cashuurta bixinteedu waa khasab iyadoo aan loo baahnayn in lala xiriiriyo wax faaiido ah oo laga helo alaabo dawladeed iyo adeegeeda (Hyman, 1990). Waa muhim in la xuso , in bixinta Cashuurta aynaan ka helayn wax toos ah iyo adeeg dhaqso ah, isla markiiba. Tan kale bixinta cadadka Cashuurta , tusaale, sh.so. 1,000,000 bishii Janaayo, macnaheedu maaha in lacagtaas aad ku helaysid adeeg caafimaad,waxbarasho,adeeg amni isla bishaas.

Sababaha aynu u bixinno Cashuurta waxay tahay in aan qof quri ahi ,awoodin in uu si buuxda u bixiyo adeega ay isticmaalayaan waana musuuliyada dawlada in ay ururiso Cashuurta si ay ugu bixiso alaabada iyo adeega ay dawladu ugu faaiidaynayso dadweynaha.

Suaalaha iyo doodaha imaanayaa waxay tahay mukuu yahay nidaamka cadaalada ah ee Cashuurta iyo qoondayn culays Cashuureed oo ku salaysan cadaalad; tusaale, Cashuur ku salaysan maal, dakhli iyo awoodii lagu bixin lahaa hawl dhaqaale ama faaiido daneed (Spitzer). Tan jawaabteedu waxay sida badan ku salaysantahay sharci iyo qaab dhismeed sharciyaysan oo lagu go'aamiyo dejinta nidaamka Cashuureed ee dalkasta. Wax kasta oo jira dejinta nidaamka Cashuurta, ahdaafta guud ee sida balaaran looga qoro nidaamka Cashuurta waxaa ka mida:

- In la soo saaro dakhli si loogu isticmaalo in lagu bixiyo hawlaha dawladda
- In ay ka kaalmayso dib u qaybinta hantida iyo dakhliga (si xaqsoor/cadaalad ah).
- Ujeedo xeerin oo muujinaysa dhiirigelinta ama dhiirigelin la'aanta shaqooyinka qaarkood sida sigaar cabida iyo sheyada la mid ah.

## 1.2 Mabaadi'da iyo Fikradaha asaaska u ah Cashuuraha

Si looga jawaabo su'aasha ah in qofkasta bixiyo Cashuur isku mid ah, waxaa haboon in la fahmo mabaadi'da saldhiga u ah nidaamka lugu qiimeeyo Cashuuraha iyo qaar ka mida ah fikradaha guud oo loo isticmaalo in si fiican loo fahmo arimaha siyaasada Cashuurta. Mabaadi'da qoran oo sida guud loo wadaago ama dabeecadaha kuu hagaya siyaasada Cashuurta waxaa ka mid ah; sinaan, haqabtir, sahlid iyo dhexdhexaad faahfaahinta macnaha mabaadi'daas waxaa loo sheegay sidaan hoos ku qoran.

- **Haqabtir**- Nidaamka Cashuurta waxaa la orankaraa mid haqab tir leh haddii la soo saaro lacag ku filan adeega dawladu dadkeeda u qabanayso, oo weliba leh, hab sii socon kara. Waxaa jira laba shey oo ka qayb qaata haqab tirida Cashuureed oo la kala yiraahdo wax xasilan/saadalin iyo u jajabnaantooda. Marka la diyaarinayo miisaaniyada, kuwa go'aan gaarista lihi waxay qiyaasaan sida caadiga ah rajada laga qabo lacagta baxaysa oo ay la socoto fikrad lagu saadaalin karo korukaca dakhliga Cashuurta. Si kastab ha ahaatee, si loo gaaro haqab tir waqtiga dheer, waa in la garankaro haddii korukaca Cashuurta la cayimay la jaanqaadi karto talaabada korukaca dhaqaalaha.
- **Sahlid- Tani** waxay xaqiijinaysaa in nidaamka Cashuurtu uu u leeyahay dariiq fudud dadka si ay u fahmaan isla markaana xaqiiqsadaan in qiimaha Cashuurta la ururinaayo iyo maamulkuba uusan ka sarayn Cashuurta dhabta ah ee la rabo in la soo saaro. Tusaale ahaan, Cashuurtu waxay noqonaysaa mid adag haddii ay yeelato Cashuur ka dhaafid badan sida Cashuur horay loo bixiyey, Cashuur dhimid dadka qaarkiis la siiyo iyo mudada ganacsigu cusub yahay in Cashuurta laga daayo. Qalafsanaantaasu waxay u egtahay in ay kordhinayso qiimihii lacag ururinta iyo maamulkii.
- **Dhexdhexaad**-Erayga la mid ah dhexdhexaadinta waa karid awoodeed (efficiency). Mabda'ani wuxuu ka jawaabayaa suaasha ah haddii nidaamka Cashuurtu faragelin ku leeyahay maalgelinta iyo go'aannada ay wax ku kharashgareeyaan shakhsiyaadka iyo ganacsataduba.


# 2. CUTUB 2 Noocyada Cashuuraha Puntland

Cashuuruhu waa ilaha ugu muhiimsan oo dawlada dakhligu ka soo galo. Cashuurtu waa lacag bixin khasab ah (payment) oo ka timaada shakhsiyaad (Cashuur bixiyayaal) oo dawlada la siiyo si ay ugu daboosho kharashka ay dawladu ku gasho danta guud.

Guud ahaan, Cashuuraha Puntland waxaa lagu kala saaraa iyadoo la raacayo nidaamka dawladu Cashuurta u ururiso. Sidaas darteed waxaa loo qaybiyaa labo dabaqadood oo balaaran.

- Cashuuraha Berigga
- Cashuuraha Furdada

**Jaantus 1:Heerarka dakhliga Cashuurta**



## 2.1 Cashuuraha Berigga

Cashuuraha Berriga waxaa ururiya waaxda Cashuuraha Berriga. Cashuurtaas, waxaa lagu kala saaraa wax si guud loo yiraahdo "saamaynta Cashuurta".

Saamaynta Cashuurtu _waxay la xiriirtaa qofkasta oo ay Cashuurtu ku waajibto kaasoo qaadaya culayska isla Cashuurtaas. Iyadoo la raacayo qaybaha Cashuurta oo loo qaybiyey sida hoos ku qoran:

**Cashuurta toosan**: saamaynta iyo bixinta Cashuurtuba waa isla qof tusaale Cashuurta dakhliga qofka, Cashuurta dakhliga shirkadaha, Cashuurta dakhliga hantida Maguurtada kuwaas oo dhan waxay ku ekaanayaan isla qofkaas.

**Cashuurta dadban:** Saamaynta Cashuurtu waxay saarantahay qof, dhacdaduna qof kale tusaale Cashuurta gaddida (sales tax).

### 2.1.1 Cashuurta Toosan

Cashuurta toosan waxaa kaloo lagu kala saaraa "Saldhiga cashuurta", Saldhiga Cashuurtu waa sheyga Cashuurta la saarayo iyo boqoleyda laga qaadayo iyadoo la raacayo dabaqadaha Cashuurta oo markale loo kala saaray sida soo socota:

- Cashuurta dakhliga
- Cashuurta raasumal faaiido laga helay
- Cashuurta dhaxalka

**Sharciyada Cashuuraha Toosan-Sharci No.5**

| T/T | Qodobka | Faahfaahin |
|---|---|---|
| 1 | Qodobka 1 | Xuduuda lagu qaadayo Cashuurta |
| 2 | Qodobka 2 | Saldhiga Qiimaynta |
| 3 | Qodobka 3 | Mudada lagu bixinayo Cashuurta |
| 4 | Qodobka 12 | Dakhliga Cashuurta laga qaado |
| 5 | Qodobka 13 | Dakhliga Qandaraasyada iyo ilaha lamida |
| 6 | Qodobka 14 | Dakhliga ka yimaada daaraha wershadaha ah |
| 7 | Qodobka 15 | Dadka laga dhaafay Cashuurta |
| 8 | Qodobka 16 | Dakhliga sida joogtada ah looga dhaafay Cashuurta |
| 9 | Qodobka 17 | Cashuur dhaaf si ku meel gaar ah loo siiyo wershadaha iyo beeraha |
| 10 | Qodobka 37 | Boqoleyda Cashuurta ku dhacda shaqaalaha |
| 11 | Qodobka 38 | Boqoleyda faaiidada ganacsiga |

### 2.1.2 Cashuurta Dakhliga

Cashuurta dakhligu waa tan ugu muhiimsan Cashuuraha toosan ee Puntland. Cashuurta toosan waxaa ka mid ah Cashuurta dakhliga waxaana lagu jideeyey **Sharciga Cashuuraha Toosan Lr 5 ee Somalia,** oo xeerka asalka ah ayna lasocdaan shaxo iyo xeer hoosaadyo isaga raacsan. In ka badan 11 qodob oo xeerka asalka ah ee ee sharciga guud (Body of Laws) Lr. No (5) waxaa lagu dhaqaa Cashuuraha toosan, sida ku xusan bogga 12aad. Rúnti, maamulka Cashuuraha toosan ee kala duwan oo kala leh boqoley kala duwan ayay fulisaa waaxda Cashuuraha Berigga ee Puntland.

Halkaan hoose waxaa lagu soo gaabiyey sharciga Cashuuraha toosan.

### 2.1.3 Ujeedada Cashuurta dakhliga

Guud ahaan, Cashuuraha toosan ee Puntland waxaa loo isticmaalaa ururin dakhli iyo ujeedo dib u qaybin. Cashuurta dakhliga waxaa loo isticmaalaa in lagu gaaro hadaf sinaaneed iyadoo loo marayo si macquul ah in qayb dadka ka mid ahi bixiso heer gaar ah oo Cashuur dakhli ah iyo boqoley. Haddii si kale loo yiraahdo cashuurta dadka qaybtiisu bixiyaan waa balaaranaysaa ama tiradii qaybta ayaa kodheysa, boqoleydii Cashuurtuna waa kordheysaa ama waa yaraanaysaa iyadoo ku xiran hadba hadafka laga leeyahay. Dib u qaybinta iyo ujeedada sinaantu waxay aad uga muuqataa cashuurta dakhliga ee qofka marka la eego noocyada kale ee Cashuurta. Sida muuqata, macquulnimada Cashuurta qaybaheeda iyo boqoleydaba waxaa loo sameeyaa si ay uga yarayso culayska kuwa dakhligoodu yar yahay ama kooban yahay oo Cashuurta ka dhiga mid loo siman yahay.

### 2.1.4 Sidee u shaqaysaa Cashuurta Dakhligu?

Ugu horayntii, Cashuurta dakhliga waxaa laga qaadaa dakhliga uu leeyahay qof kasta oo degan Puntland. Deganaansho waxaa lagu tilmaamaa qof kasta oo si rasmi ah u degan Puntland oo ku qaatey qayb kasta oo ka mida ah shaqo sanadeedkiisa dalka; ama kan isagu aan deganaansho rasmi ah ku lahayn Puntland laakiin ku qaatay 183 maalmood ama wax ka badan dalka, kana shaqaynaayey dalka mudadii qiimaynta la sameeyey.

### 2.1.5 Noocyada Cashuurta Dakhliga

Qodobka 12 aad (a,b,c,d,e,f) Cashuurta dakhliga waxaa laga qaadayaa dakhliyada soo socda oo laga helay inta dalku ka kooban yahay.

- Dakhliga ganacsiga iyo xirfadaha (Faaiido ka timi wershed, ganacsi ama hawl xirfadeed)
- Dulsaar ama dhimid, lacag hawl gab la siiyo, lacagta qoraaga la siiyo.
- Lacag raasumaal laga helay-(si fursad ah iyo si aan caadi ahayn lagu helay)
- Dakhli beereed
- Si dhab ah ama si qiyaasa oo dakhli looga helay dhisme ama wixii la mid ah
- Hawl gab iyo dakhli shaqo ka yimi qaab kasta ha ahaadee oo lagu bixiyey heshiis shaqaale lala galay.

Qodobada 13aad and 14aad waxay sheegayaan in Cashuurta dakhliga la saaro dakhliga ka yimaada qandaraasyada shaqo ama alaab keenis, iyo dakhli ka yimi dhismaha wershedaha siday ukala horeeyaan.

Xaqiiqadii, dakhliga qofkasta oo ganacsi leh waxaa lagu magcaabaa Cashuurta dakhliga ee qofka (Personal income tax) iyo tan shaqada ka timaada oo raacsan in aad u bixiso hadba wixii aad shaqadda kaheshay (PAYE). Taas waxaa dheer, Cashuur la hayo oo ka timi dakhliyo kale sidii horay loo sheegay, oo iyadana lagu magcaabo lacag Cashuur loo qabtay halka Cashuurta shirkadaha la saaro faaiidada shirkadadaha qaantoodu xadidan tahay .

### 2.1.6 Dakhliga ka yimaada Shaqada

Dakhliga ka yimaada shaqada oo la cashuuro waxaa ka mida ah mushaharka (billaha ama asbuuclaha), khidmadaha, guno, Habeen dhax, cawil celin la xiriirta shaqo ama ganacsi dhamaaday. Habka Cashuurta looga ururiyo ilaha wax ka soo galaan qofka shaqeeya waxaa la yiraahdaa "U bixi sida aad shaqada wax uga heshay". Loo shaqeeyuhu wuxuu Cashuur cayiman ka jarayaa shaqaalaha mushaharkooda ka dibna wuxuu u gudbinayaa wixii uu ka jaray waaxda Cashuuraha Berigga. Tani waxay ka yaraynaysaa culayska shaqaalaha Cashuurta ay bixin lahaayeen sanadka dhamaadkiisa, waxayna ku wareejinaysaa masuuliyadii loo shaqeeyaha.

Cashuurta shaqada waxaa laga qaadaa boqolay ku salaysan oo ka bilaabata 2% gaartana 10%. Tan ugu horaysa oo sida duuduubka lagu Cashuuro waa dakhli sanadle ah oo ah Sh.so 4,812000-48,000,000 boqoleydeedu waa 2% ilaa 9% iyo kuwa u sareeya oo qaybo Cashuureed kala leh oo dakhli sanad lahoodu ka badan yahay sh.so 48,000,000 waxaa laga qaadaa 10%. Waa muhim in la ogaado in boqoleyda Cashuurta iyo qaybaha Cashuurta wax laga bedeli karo waqti illaa waqti iyo qaybahii Caashuureed iyo boqoleydii jirtey illaa 1998 waa wixii lagu daray qaybta boqoleyda Cashuuraha toosan.

**Shaxda haddeer boqoleyda B waa sidaan hoos ku qoran:**

| Nooca Cashuurta | Heer Cashuur | Cadad lacageed bishii Sh.so (000) | Cadad lacageed Sanadkii Sh.so (000) | Boqoley |
|---|---|---|---|---|
| Cashuurta dakhliyada shaqada iyo hawlgabka | I | Illaa 400 | Wixii ka yar 4,812 | C.dhaaf |
| | II | 401-800 | 4,812-9,600.00 | 2% |
| | III | 801-1200 | 9,601-14,400 | 3% |
| | IV | 1201-1600 | 14401-19,200 | 4% |
| | V | 1601-2000 | 19,201-24,000 | 5% |
| | VI | 2001-2400 | 24,001-28,800 | 6% |
| | VII | 2401-3000 | 28801-36,000 | 7% |
| | VIII | 3001-3500 | 36,001-42,000 | 8% |
| | IX | 3501-4,000 | 42,001-48,000 | 9% |
| | X | | Ka badan 48,000 | 10% |
| | | | | |

Marka la tix-raaco sharci Lr 65 oo ay ansixiyeen golaha wasiiradda Puntland markii danbana ay baarlamaanku ansixiyeen 2011, waxaa dikreeto lagu sheegay in shaqaalaha aan dawladda u shaqayn oo la shaqeeya shirkadaha gaarka loo leeyahay ee gudaha, Haya'daha caalamiga ah iyo wakaaladaha Qaramada midoobey, waxay ku khasban yihiin in ay cashuurta ka bixiyaan mushaharkooda iyaga oo raacaya shaxda cashuureed ee hoos ku qoran.

Qodobka 40-aad ee xeer Lr- 65 lagu sheegay qaybtiisa 1[aad] waxay sheegaysaa:

" In shaqaalaha aan dawladda u shaqeyn ku khasbanyihiin in ay cashuur ka bixiyaan wixii dakhli ah oo soo galay, oo loo shaqeeyaha awood loo siiyey in uu ka jaro cashuurta mashaharkooda, loo shaqeeyayaasha waxaa looga baahan yahay in ay u qaadaan lacagta laga jaray oo ay weheliso warqaddii marag mushaharka xafiiska cashuuraha beriga ee ugu dhow. Loo shaqeeyayaasha ku fashilma in ay raacaan qodobkaan oo iska indha tira cashuur ka jaridda mushaharka shaqaalahooda waxaa loo arkayaa ku xadgudbayaal qormadii ay sheegeen xeerarku, waxaana lagu ciqaabayaa sharciga sida uu sheegayo qaybta 6[aad] ee xeerka kor ku xusan.

**Shaxda A Boqoleyda Shaqaalaha Rayidka ah**

| Tirada | Dakhliga boqoleyda xadidan ( US $) | Boqoleyda Canshuurta % | Qiyaasta lacageed |
|---|---|---|---|
| 1 | **0-100** | **0** | **Waa loo dhaafay** |
| 2 | **101-800** | **6%** | **6%** |
| 3 | **801-dakhli ka badan** | **12%** | **12%** |

### 2.1.7 Dakhliga ka yimaada Ganacsiga (wax kala iibsi, wershedayn, beer) iyo Xirfad

Dakhliga ka yimaada ganacsiga iyo xirfadaha oo la Cashuuro waxaa ka mid ah dakhliga ka yimaada wershedaynta, wax kala iibsiga, beeraha iyo dakhliga xirfadaha. Dakhligaas la Cashuuro waxaa laga qaadayaa boqoley ka bilaabata 8% ilaa 12%.Faafaahinteeduna waxay ku taal qaybta boqoleyda Cashuuraha.

### 2.1.8 Cashuurta dakhliga shirkadaha

Cashuurta dakhliga shirkadaha waxa la saaraa faaiidooyinka ay helaan shirkadaha u diinwaangashan kuwa qaantooda xadidan tahay (limited). Cashuurta shirkaduhu waxay la mid tahay tan Cashuurta dakhliga qofka keligiis laga qaado, marka laga reebo cashuurta shirkadaha oo aan lahayn qaab boqoley ah oo hadba kor u sii kacaysa.

Shirkadaha degan Puntland waxaa lagu Cashuuraa boqoleyda kala ah 8%, 10% iyo 12% oo laga qaado faaiidada ka timaada ganacsiga,wershedaynta iyo xirfadaha sida ay u kala horreeyaan.

### 2.1.9 Cashuurta dakhliga ka yimaada dhismaha

Cashuurta dakhliga oo la saaro dakhliga ka yimaada dhisamaha, dhulka iyo wixii kale oo qaab dhismeed leh waxaa lagu Cashuuraa boqoley joogto ah oo kala ah 4% marka laga jaro 20% oo ah wixii dayac tir ah.

Saldhiga Cashuurta waa in si shrci ah loo qeexaa, lana sheego tiradiisa si loo xaddido awooda Cashuur bixinta ee Cashuur bixiyaha. Dawladu waa in ay eegto markii ay go'aan ka qaadanayso qadarka Cashuurta xadadkaan fadhiya ee hoos ku xusan:

- Wixii kharash ah oo ku baxaya Cashuur ururinta
- Maamulka iyo saamaynta Cashuuraha
- In ay go'aan ka qaadato sida ugu wanaagsan ee ay isugu xiri karto arimahaas.

### 2.1.10 Boqoleyda Cashuurta dakhliga

Qadarka Cashuurta waxaa macnaheedu yahay boqoleyda saldhiga Cashuurta oo laqaadanayo ama la saarayo haddii wax la cashuurayo. Hal gundhigyada maaliyadeed, ee qaybtooda hoos lagu sheegay waa la isticmaali karaa markii la diyaarinayo qadarka Cashuurta oo lagu salaynayo sheyga Cashuurta laga qaaday. Waxay noqon karaan: mid Gadaal u socod ah, mid isu dheeli tiran iyo mid horay u socota.

| Saldhiga Cashuurta | Faahfaahin |
|---|---|
| Cashuur Gadaal u socota | Cashuurta waa gadaal u socod haddii hantiiluhu oo la rabey in uu Cashuur badan bixiyo, boqoley yar dakhligiisa ka bixiyo |
| Cashuur isu dheelitiran | Cashuurtu waa mid isu dheeli tiran markii Cashuur bixiyayaashu ka bixiyaan dakhligooda boqoley isku mida |
| Cashuur horay u socota | Cashuurtu waa hor u socod marka hantiiluhu ka bixinayo boqoley badan dakhligiisa |

Qodobada 37 iyo 38 waxay qeexayaan qadarka Cashuurta dakhliga waxaana loo qaybiyey shaxo, tusaale;

**Shaxda A** Waxaa lagu dhaqaa qadarka Cashuurta oo ku dhacaysa dakhliga ka yimaada dhismaha

**Shaxda B** Waxaa lagu dhaqaa qadarka Cashuurta oo ku dhacaysa dakhliga shaqada

**Shaxda C** Wuxuu ka hadlayaa qadarka Cashuurta oo ku dhacaysa dakhliga ka yimaada ganacsiga, wershedaynta, beeraha, xirfadaha, mihnada iyo wixii la mida

**Shaxda D** Wuxuu ka hadlayaa qadarkka Cashuurta oo ku dhaca dakhliga Shirkadaha leh diiwaan gelin sharciyaysan.

**Tabeela 1 Shax A:**

| **Nooca Cashuurta** | **Boqolay cashuurta** |
|---|---|
| Cashuurta la saaro dakhliga ka yimaada dhismaha cadadkasta oo uu yahay marka laga reebo 20% oo loo daayay dayactir | 4% |

**Nb: boqolayda kor ku qoran waa la dhimay , waxayna horay u ahayd 10% waxaana iminka laga dhigay 4% oo ku dhacaysa dakhliga kirada kdib marka laga jaro 20% oo loogu daayay dayactir ahaan.**

**Shaxda B: Boqoleyda shaqaalaha Rayadka ah**

| Tirada | **Barbilow** | **Boqoley** |
|---|---|---|
| 1. | **Ilaa $100** | Cashuur dhaaf |
| 2. | **Wixii ka badan $100** | 6% |

- Boqoleyda kor ku qoran waxaa laga qaadayaa muwaadiniinta Soomaalida ah oo u shaqeeya shirkadaha gaarka loo leeyahay, hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa Qaramada Midoobey sida uu qorayo Sharci Lr 65.

**Shaxda C:** Cashuurta ku dhacda faaiidada laga helo wershedeynta iyo Xirfadaha oo laga fuliyo ganacsi qof leeyahay iyo mid qayb laga yahay

| **T/T** | **Nooca** | **Boqoleyda** |
|---|---|---|
| 1 | Faaiidada laga helo dakhliga ganacsiga | 12% |
| 2 | Faaiidada dakhliga wershedeynta | 10% |
| 3 | Faaiidada laga helo xirfadaha | 8% |
| | | |

- Boqoleyda kor ku taal oo ku dhacda faaiidada waxay noqonaysaa mid aan isbedelin intii waqti ah laakiin farsamada sidii ganacsatu u xaddidi lahayd faaiidadooda dakhliga Cashuurtu ku dhacayso looguna gudbin lahaa Waaxda Cashuuraha Berigga, waxay u baahantahay in la sii horumariyo.

## 2.2 Cashuur Dhaafyada

### 2.2.1 Shaqsiyaadka laga dhaafay Cashuurta Dakhliga

**Sida uu tilmaamayo qodobka 15aad dadka soo socda waxaa laga daayey bixinta Cashuurta Dakhliga:**

- Mushaharka Madaxweynaha
- Hantida dawlada dhexe iyo D/hoose
- Hay'adaha Caalamiga ah taasoo waafaqsan sharciyada qanuunka Dawliga ah, iyo heshiisyada caalamiga ah oo Dawladu gasho.
- Wakiilada Diblumaasiga ah ee Dawladaha shisheeye xaga musharkooda iyo wixii dhaqaale ah oo iyaga soo gala oo ku saabsan shaqadooda
- Qunsulada Dawladaha shisheeye dhinaca Mushaharkooda iyo dhaqaalaha kale ee u soo gala shaqadooda awgood.
- Shaqaalaha Qaramada midoobay iyo Hay'adaha iyaga la xiriira taas oo waafaqsan heshiisyada caalamiga ah, xaga mushaharooyinkooda iyo dakhliga kale ee soo gala shaqadooda dartood.
- Xubnaha ciidamada qalabka sida iyo kuwa ciidanka u eg oo darajadoodu ka hooseyso saraakiil xigeen oo shaqeeya, xagga mushaharooyinkooda iyo wixii shaqada ka soo gala
- Hay'adaha samafalka ah oo sharciyeysan, Hay'adaha waxbarashada, macaahiida, jaamacadaha iyo jamciyadaha leh ujeedo dhaqan oo kaliya, macaahiida diinta; marka laga reebo haddii dakhliga ka yimaada ganacsi oo ka baxsan cashuur dhaafka.

### 2.2.2 Dakhliga sida joogtada ah looga dhaafay Cashuurta

Qodobka 16-aad wuxuu sheegayaa in aysan Cashuurta dakhligu ku waajibin waxyaalaha soo socda:

- Daaraha loogu tala galay cibaadeysiga iyo wixii raaca
- Xarumaha qabuuraha iyo wixii la xiriira
- Guryaha Dawladu leedahay
- Guryaha Safaaradaha, Qunsuliyadaha, waxaase khasab ah in Dawlada wakiilka loo yahay leedahay Mulkiyada.
- Guryaha loo isticmaalo Dugsiyada waxbarasho, taas waxaa ku jira dugsiyada gaarka ah, waxaase khasab ah in dugsiyadaasi u habaysan yihiin samafal ka diiwaan gashan Wasaarrada Waxbarashadda.
- Dhismayaasha beeraha ku dhexyaal oo uu leeyahay qofka beerta lihi, bishardi in loo isticmaalo deegaan dadka beerta ka shaqaynaya, waxaa kaloo shardi ah in qiimaha dhismuhu ka badneyn Sh.so 300,000 ama in dhismaha loo isticmaalo goob lagu bacrimiyo xoolaha, ama loo isticmaalo kaydis ama farsamayn badeecad ama wax soo saar beereed, taas waxaa raaca dhismaha loo isticmaalayo keydinta qalabka iyo materyaalka dhulka looga shaqeeyo
- 40% Faaiidada aan la qaybin ee wershadeynta ka timid oo ku muujisan warqada miisaaniyada, waxaase khasab ah faaiidadaasi in ay ka muuqato warqada miisaaniyada iyadoo ah maal gelin cusub waana in aysan dhaafin 25% dakhliga la Cashuurayo. Waxaa la Cashuurayaa intii laga reebay faaiida aan la qaybin oo meel loo dhigay si maalgashi ah.

**2.2.3 Cashuur ka dhaafid ku meel gaar ah oo loo fidiyey warshadaha iyo Shirkadaha**

Qodobka 17-aad wuxuu cadaynayaa in Cashuur dhaaf ku meel gaar ah loo fidiyey shirkadaha warshedaha iyo beeraha sida hoos ku cad.

- Wasaaradda Maaliyadu waxay sameyn kartaa in ay muddo aan ka badnayn10 sano Cashuurta laga daayo qayb ahaan ama gabi ahaan Warshadaha cusub ama Shirkadaha beeraha cusub marka ay sidaas soo jeediso Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsigu, marka hawl warshado ay ku saabsan tahay, ama ay soo jeediso WasaaraddaBeeruhu iyo X.Xooluhu marka hawl beero ay ku saabsan tahay.
- Cashuur dhaafis waxaa kaliya oo la bixin karaa haddii shirkada ay khusayso ay cadayso in ay ku socoto khatar aan caadi ahayn oo uu ku soo saarayo alaab cusub, ama iyagoo saarista alaabo u isticmaalayo farsamo horumarsan oo aan horay loo isticmaali jirin.
- Cashuur dhaafis waxaa kaloo loo bixin karaa haddii hal abuuruhu caddeeyo in ay ku socoto khatar aan caadi ahayn oo ay ku fulinayso hawl Warshadeed ama Beereed oo aan ku lug lahayn habeynta dhabta ah ee alaabtaas, la dhawrayo si xaalada alaabtaas qiimaheeda dhaqaale kor loogu qaado.
- Cashuur dhaafis waxaa kaloo la siin karaa halabuurka balaarinaysa ama si qoto dheer dib u cusboonaynaysa ganacsi horay u jirey, waxaase khasab ah in shuruudaha lagu sheegay baaragaraaf 2aad iyo 3aad ee qodobkaan in la fuliyo.
- Shirkad hal abuur oo cadaysa in ay soo saarayso alaab la mid ah ama isticmaasha farsamo la mid ah shirkad kale oo laga dhaafay Cashuurtii dakhliga waa laga deyn karaa wax aan ka badneyn inta shirkada kale la siiyeyay. Cashuur ka dhaafkaasi waxay dhacaysaa taariikhda Cashuur kadeynta la siiyey shirkada kale ay dhacayso.

Cashuur dhaafkaan waxaa laga deyn karaa dakhli aan ka badnayn 10% raasumaalka la maalgeliyey iyo muddada ugu muuqda Wasiirka Maaliyada in loo baahanyahay raasumaalka la maalgeliyey joogto loo dhimo.

## 2.3 Cashuurta Dadban

Cashuurta dadbani waa tan ugu badan oo Puntland ururiso waxaana loo qaybiyaa lix qaybood oo ku salaysan Shuruucdii iyo Xeerarkii soo baxay intii u dhaxaysey1960kii iyo 1980kii. Maamuladii soo maray mudaddii ay Puntland jirtey waxay qaadeen tallaabooyin ay ay wax uga baddalayaan taarifooyinka iyagoo fiirinaya sicir bararka ku yimi shilinka Somaaliga iyo qiimaaha sarrifka ee Shilinka Soomaaliga ah markii loo eego Dolarka Maraykanka.

### 2.3.1 Cashuuraha Diiwaangelinta

Sharciga Cashuurta Diiwaangelinta Lr. 4 ee oo soo baxay 4 Janaayo 1985 ee waqtigii Dawladii Somalia, ayay Puntland qaadatay markii la asaasay, Cashuurta Diiwangelintu waxay ku waajibtaa, dhammaan heshiis,qandaraas, qaansheegadyada, wareejinta hantida (guurtida iyo maguurtida) islalahaanshaha, Diiwaangelinta Shirkadaha, heshiisyada kirooyinka guryaha, iyo Diiwaangelinta baabuurta la kireeyo.

**Tabeele 2: Cashuuraha Diiwaangelinta**

| Lr | Ujuurada Diiwaangelinta | Boqoley |
|---|---|---|
| 1 | Diiwaangelinta Qaansheegadka | 3% |
| 2 | Diiwaangelinta Baabuurta la Kireeyo | 3% |
| 3 | Diiwaangelint qandaraasyada | 3% |
| 4 | Diiwaan gelin rahanka | 2% |
| | a) Cusboonisiinta rahanka-sh.so 20,000 | |
| | b)tirtiridda rahanka | 1% |
| 5 | Diiwaangelinta kala wareejinta Hantida Maguurtida | 5% |
| 6 | Diiwaangelint Qaybsashada Hantida Maguurtida | 3% |
| 7 | Diiwaangelinta islalahaanshaha Hantida Maguurtida | 8% |
| 8 | Diiwaangelinta islalahaanshaha Hantida aan guurin | 4% |
| 9 | Diiwaangelinta Baabuurta aan sumada lahayn | 2% |
| 10 | Diiwaagelinta heshiiska daaraha la kireeyo | 1% |
| 11 | Diiwaangelinta labo qof oo is dhaxlaya, walaalo ah ama isqaba | 4% |
| 12 | Diiwaangelinta shaqsiyaad oo tafiir wadaaga illaa 4 oday | 8% |
| 13 | Diiwaangelinta Raasumaalka asaasigga ah ee shirkadaha | 0.8% |

**Tabeele 2a: Cashuuraha Diiwaangelinta cusub**

| Lr | Ujuurada Diiwaangelinta | Boqoley |
|---|---|---|
| 1 | Diiwaangelinta Qaansheegadka | 3% |
| 2 | Diiwaangelinta Baabuurta la Kireeyo | 1% |
| 3 | Diiwaangelint qandaraasyada | 2.5% |
| 4 | Diiwaan rahanka | 2% |
| | a) Cusboonaynsiin-sh.so 20,000 | |
| | b) Tirtiridda rahanka | 1% |
| 5 | Diiwaangelinta kala wareejinta Hantida Maguurtida | 2.5% |
| 6 | Diiwaangelint Qaybsashada Hantida Maguurtida | 2% |
| 7 | Diiwaangelinta islalahaanshaha Hantida Maguurtida | 2.5% |
| 8 | Diiwaangelinta islalahaanshaha Hantida aan guurin | 4% |
| 9 | Diiwaangelinta kalwareenjinta Baabuurta aan sumada lahayn | 1% |
| 10 | Diiwaagelinta heshiiska daaraha la kireeyo | 1% |
| 11 | Diiwaangelinta labo qof oo is dhaxlaya, walaalo ah ama isqaba | 4% |
| 12 | Diiwaangelinta shaqsiyaad oo tafiir wadaaga illaa 4 oday | 8% |
| 13 | Diiwaangelinta Raasumaalka asaasigga ah ee shirkadaha | 0.5% |
| 14 | Hagaajinta Wadooyinka | 2% |

- Cashuuraha Diiwaangelinta waa la dhimay sida ku muujisan Tabeelaha 2a ee kor ku xusan.
- Wasaaradda Ganacsigu & Warshaduhu waa in ay xiriir la samayso Waaxda Cashuuraha Beriga inta ayan usoo saarin ruqsad ganacsi shirkadaha raba in ay maalgashadaan Puntland, maxaa yeelay waxaa khasab ah in Shirkadaha cusubi ka bixiyaan boqoley u dhiganta 0.5% Raasumaalkooda.

### 2.3.2 Cashuuraha Boolada

Sida Shuruucda Puntland u badan tahay, Cashuurta Boolada waxaa sidoo kale laga qaatay Dawladdii Somalia,Xeer sharci Lr.6 oo soo baxay 6/December /1966. Baaxadda iyo Faahfaahinta sharciga Cashuuraha Boolada waxaa lagu qeexay qodobada 1aad illaa 44aad. Cashuurta Boolada waxaa la saaraa dhammaan waxyaabaha ku cad xeerka sharci ee kor ku xusan oo ka jira ama laga isticmaalo Puntland gudaheeda.

Cashuurta Boolada waxaa la saaraa wax kasta oo la xiriiraa kala waraajinta islalahaanshaha ama mulkiyad alaab, lacag, saamiyaal, ama wax la xiriira kala wareejin alaab ama saami ka baxaya ama la soo galiyey gudaha puntland.

**Tabeele 3: Cashuuraha Boolada**

| Lr | Nooca Cashuurta | Boqoley |
|---|---|---|
| 1 | Cashuurta Boolada ku dhacda qaansheegadka | 2% |
| 2 | Cashuurta Boolada ku dhacda mushaharooyinka | 1% |
| 3 | Cashuurta Boolo dakhli ama mid kharash | 2% |
| 4 | Cashuurta Boolada biilasha caalamiga ah sida kuwa safarka | 2% |
| | | |

- Boqoleyda Cashuuraha Boolada kor ku xusan isma bedelin.

### 2.3.3 Cashuurta Gadida

Sharciga Cashuurta Gadida Lr .2 oo soo baxay bishii Janaayo 1984 waxaa keenay madaxweynihii Dawlada Somalia waqtigaas si uu u siyaadiyo dakhliga Dawladda una guto waajibaadka ka saaran kobcinta dhaqaalaha, amniga, difaaca, bulshada iyo siyaasada. Cashuurta Gadida waxaa la saaraa, badeecadaha soo dega, jumlooyinka, qaansheegadka adeegyada iyo wax soosaarka gudaha.

Baaxadda iyo faahfaahinta Cashuurta Gadida waxaa lagu sharxay qodobada u dhexeeya 1 illaa 22, boqoleyda Cashuurta Gadidu oo ah 5% waxaa la saaraa qiimaha badeecadaha soo dega, qiimaha sheyga ama qaansheegadka adeegyada ganacsi. Cashuurta Gadida kuma jirto "Boolo" taas oo ah Cashuur dowladeed oo kale laftigeedu.

**Tabeele 4: Cashuurta Gadida**

| Lr | Nooca Cashuurta | Boqoley |
|---|---|---|
| 1 | Cashuurta Qaansheegadka Hoteelada | 5% |
| 2 | Cashuurta Isgaarsiinta- ku hadlidda | 5% |
| 3 | Cashuurta Sarifka lacagaha qalaad | 5% |
| 4 | Cashuurta Badeecadaha Jumlooyinka lagu gado | 3% |
| 5 | Cashuurta Waxsoosaarka gudaha | 5% |

- Cashuurtaan waxaa lugu bedelay Boqoleyda ku muujisan Tabeele **4a** ee hoos ku qoran.

**Tabeele 4 a: Cashuurta Gadida ee Cusub**

| Lr | Nooca Cashuurta | Boqoley |
|---|---|---|
| 1 | Cashuurta jiifka hoteelada | 3% |
| 2 | Cashuurta Badeecadaha jumlada lagu gado (wholesalers) | 1% |
| 3 | Cashuurta adeega ku hadalka khadadka talefoonadda | 3% |
| 4 | Cashuurta adeega sariflayaasha iyo Bangiyada gaarka loo leeyaha | 3% |
| 5 | Cashuurta adeega xirfadlayaasha (professionals) | 1% |

## Cashuurta Gadida ee Puntland

Qiyaas 5% cashuur duuduub ah ayaa laga qaadaa ganacsiyada laga abuuro Puntland. Cashuurtaa waxaa la bixiyaa bil kasta , waxaana maamulka cashuurta ka masuul ah waaxda Cashuuraha Berriga Puntland. cashuurtu gabi ahaan waa qiyaas aan ku salaysneen warqadaha lugu gaday ganacsiga.

Sidaas darteed, waxay dhalin kartaa cashuur dhiman ama cashuur dheeraad ah oo ku xiran heerka gadidda wax is dhaafsiga laga sameeyay ganacsiga. Si taas looga fogaado nocaas lacag saaridda ah oo loo dhaliyo dakhli ka yimaada ganacsiga oo ka qayb qaada kara cashuur badan oo heer keeda dakhli la socota, qaab cashuureed gadid oo socon kara ayaa loo baahan yahay in Puntland laga hirgaliyo oo ku salaysay badeecadda ama adeegga la cashuurayo ee ganacsigaas.

**Diiwaan galinta**

Puntland ganacsiga iyo xirfadaha ka jira oo loogu talagalay in lugu cashuuro badeecadaha iyo adeega waxaa looga baahan yahay in loo diiwaan galiyo cashuurta gadida. Ganacsiga cusub ee la furay waa in lugu ogaysiiyo 30 barri gudahood Cashuuraha Barriga markii la bilaabo. Hadii ganacsiga cashuurta laga qaadayo joogsado waa in cashuuraha berriga lugu ogaysiiyo 30 berri gudohood. Ganacsigu waa mid ka jira Puntland hadii go'aan qaadashada maamulka asaasiga ah iyo shaqooyinka maamulka dhaxe laga fuliyo Puntland ama ganacsigu uu yahay mid si rasmiya oo ay oga muuqdaan dad iyo qalab farsamo si badeecadda looga cashuuro Puntland.

Ganacsiga aan saldhiggiisu ahayn Puntland oo ah ganacsi dibadeed (overseas traders) waa inuu isa soo ogaysiiyaa cashuuraha Puntland inuu ka samaysanayo badeecad cashuureed ku waajibto Puntland gudaheeda

a) Saldhiga wax la qaadayo: Cashuurta gadida waxaa laga qaadaa badeecad keenis iyo adeeg ka jira Puntland , cashuurta gadida waxaa laga qaadaa cashuur laga helay ganacsi uu dhaqaajiyay qofka la cashuurayo. Tusaale ; qof shakhsiya , shirkad in la wadaago iyo mid qayb laga yahay oo la diiwaan gashay. Qofka la cashuurayo waa in uu ka diiwan gashan yahay Cashuurayaha Berriga Puntland

b) Sidee Cashuurta Gadida loo Xisaabiyaa?

Meesha saldhiga Cashuurta u ah caadi ahaan waa marka badeecada la geeyo iyo adeega marka la qabto. Kuwa jumlada gada iyo qaybaha adeega oo nidaam qaansheegad computer lugu soo saaray leh waxaa looga baahan yahay inay ka mid yihiin qaansheegadku qadarka cashuurta gadida oo caadi ah. Tusaale Dhakhtar asagu leh adeeg xirfadeed sida dhakhtarka guud ee daaweenta oo cadadka dakhli oo uu soo saaray yahay $ 400, waxaa looga baahan yahay in ay ka mid noqoto biilka dadka lacagta laga qaadayo boqolayda cashuurta gadida oo dhan 1%. isu gaynta biilku wuxu noqonayaa $ USD 404 ( 400* 1%) cashuurta gadida ah.

**Maamulka Cashuurta**

Wax is dhaafsiga mudda cashuurta waa in lugu soo gaabiyo xisaab u gaar ah inta cashuurta gadidda. Cashuurta gadidda ganacsigu diiwaan gashan waa in uu keeno qaansheegadyo la xiriira wixii badeecadda la cashuuray laga helay mudda cashuureedka. Ganacsiga waxaa looga baahan yahay in la sameeyo lacag bixin bil kasta ah oo cashuurta gadida ah kuna salaysan qiimaha qaansheegadka lugu jaray badeecadda ama adeega. Agaasimaha Waaxda Cashuuraha Barriga iyo shaqaalihiisuba ayaa mas'uul ka ah maamulka cashuurta gadida.

Waqtiga ay ku egtahay lacag bixinta cashuurta waa 10 bari , ka dib markii ay dhamaato mudada cashuurtu . Tusaale ahaan, hadii mulkiiliha hoteelku uu sameeyo isu gaynta waxa la helay (qaan sheegad) ah $ ( 2000*3%) cashuurta gadida ah markii mudada cashuurta dhamaato 30/04/2014, cashuur bixiyaha waxaa looga baahan yahay inuu bixiyo lacag ah $60 ( 2000*3%) inta ka horaysa 10/ May /2014.Waxaa jira muddo 10 cisho ah oo ixsaan loogu sameenayo hadii uu cashuur bixiyo ka keeno cududaar macquul ah oo ku saabsan lacag bixinta dib u dhacday. Dul saar 5% oo cashuurta waajibtay ah ayaa la saarayaa marka ugu horaysa lacag bixinta uu la daahay, ka dibna 10% iyo ugu badnaan 15% lacag bixinta wixii intaas ka danbeeya.

Marka la raaco qodobka 12aad ee sharciga cashuurta wax soo saarka gudaha oo soo baxay 1985, Waaxda Cashuuraha Barrigu waxay hubin kartaa lacagta lugu leeyahay qofkasta ay cashuuri ku waajibtay

a) Waxay ku amri kartaa qofka inuu u yimaado hubin waqti kasta meeshii waaxdu u cayimto keenana buug kasta oo xisaabeed, miisaaniyadii ama wixii kale oo waraaqo qoraal ah oo waaxdu u aragto inay muhim yihiin.
b) Waxay waydiisan kartaa ciidanka ilaalinta cashuuraha ama shaqaalaha waaxda inay baaraan meharad ganacsi oo kasta oo hubiyaan qoraal kasta oo ay u arkaan in lugu xaqiijin karo cashuurta lugu leeyahay.
c) Waaxda Cashuuraha Barrigu waxay ku samayn kartaa nooc kasta oo kormeera meheradda warshadaa, si ay u xaqiijiyaan in si ku haboon loo fuliyey sharcigaa.

1 .a) Qodobka 11aad ee sharciga kore wuxu sheegayaa in cashuur bixiyo xaq u leeyahay inuu ka dacwoodo qiimaynta ay sameesay waaxda Cashuuraha Barriga iyadoo la raacayo qodobka 10 ama cashuurta la saaray iyadoo la aacaya qodobka 2aad.

b)Dacwadda ku qoran xagga kore waxaa lugu samayn karaa oo lugu dhaqi karaa si habkaa la mid ah iyo hab raaca lugu sheegay sharciga guud ( body of Laws) oo soo baxay 5/11/1966

2. Dacwad lid ku ah cashuurta ay uruurisay waaxda furdooyinka sida ku qoran sharcigaan waa la samayn karaa oo lugu dhaqmi karaa ayadoo la raacayo qodobada sharciga furdada.

### 2.3.4 Cashuurta wada marista baabuurta (Vehicle Road tax)

Canshuurta wada marista waxaa la saaraa qofka ay warqadiisu ka muuqato mulkiyadda Sharciga ah ee uu baabuurku leeyahay, hab raaceedana waxaa laga heli karaa xeer Lr 4 Oo ku taariikhaysan December /28/1965 ee dowladdii Somalia. waxayna dhaqan galisay Dowladda Puntland bishii 01/January/2000.

Sharicga Canshuurta wada Maristu waxaa lugu qeexay inta u dhaxaysa qodobka 1aad iyo qodobka 28aad. Boqolay kala duwan oo laga qaadayo noocyada baabuurta kala duwan( **fadlan eeg tabeelaha 5aad** )

**Faahfaahin muhim ah oo ku saabsan baabuurta ayaa lugu qeexay boqolayda laga qaadayo waxaa ka mid ah:**

a) Baabuurta yar yar
b) Baabuurta waa wayn
c) Basaska
d) Cagafyada ama gaadiidka loo isticmaalo beeraha iyo wiishashka qalabka waa wayn lugu qaado.
e) Baabuurta tareelaha ka yar ayr
f) noocyada kala duwan ee Mootooyinka matoorka leh
g) Booyadaha

| Xoog Faraska | Canshuurta wada Marista | Canshuurta Boolada | Wadarta |
|---|---|---|---|
| | Sh.so('000) | Sh.so('000) | Sh.so('000) |
| HP24 Land Cruiser<br>Land Rover<br>3F & 4F<br>Nissan Petrol | 1,204 | 24 | 1,228 |
| HP 2 Surf<br>Hiluz<br>Paredo<br>Toyata 4*4 | 896 | 18 | 914 |
| HP 18 Mark II<br>Separated bus | 588 | 12 | 600 |
| HP14 Bus jiir<br>Mark II<br>Salon<br>Jeesar<br>Midsubishi | 448 | 9 | 457 |

**Gaadiidka Dadwaynaha**

| Xoog Faraska | Canshuurta wada Marista | Canshuurta Boolada | Wadarta |
|---|---|---|---|
| | Sh.so('000) | Sh.so('000) | Sh.so('000) |
| HP14 Bus Jiir ah Mark II Salon | 224 | 24 | 248 |
| HP12 | | | |
| HP Mark II Bus Caravan | 280 | 6 | 286 |

| Noocyada | Cashurta wada marista Sh,so ( '000) | Canshuurta boolada Sh,so ( '000) | Wadar Sh,so ( '000) |
|---|---|---|---|
| **DAYNE 1 tone** | **112** | **2** | **114** |
| **DAYNE 2 tone** | **252** | **5** | **257** |
| **DAYNE 3 tone** | **192** | **8** | **200** |
| **DAYNE 6 tone** | **840** | **32** | **872** |
| **FUUSE 4 tone** | **504** | **11** | **515** |
| **CANDHA MEYDLE 8-12 Tonne** | **120** | **22** | **142** |

| Noocyada | Cashuurta wada marista | Cashuurta boolada | wadar |
|---|---|---|---|
| Cashuurta wada marista ee B/wiishka leh iyo kuwa booyadaha ah | 510 | 26 | 536 |

### 2.3.5 Cashuurta Wax soo saarka gudaha

Cashuurta wax soo saarka guduhu waxay ku salaysan tahay xeer sharci Lr 3 oo taariikhdiisu tahay 23 May 1985 ee dowladii Somaliya. Kaasoo la ansixiyey sharciga canshuurta wax soo saarka gudaha (Exice Tax act). Baaxadda iyo faahfaahintaba waxaa lugu qeexay inta u dhaxaysa qodobbada 1 ilaa 19aad. Qodobka 1aad wuxu sharxayaa canshuurta wax soo saarka gudaha_canshuurta waxaa la saaraa, badeecadaha laga soo saaro dhamaantood ama qaybtood Puntland kuwaasoo ay kui jiraan kuwa lugu habeeyo gudaha dalka ,lugu dhaleeyo , lugu qasacadeeyo, lugu safeeyo,ama hab kasta oo kale. Markii alaabtaas lugu soo dajiyo boqolay la mid ah canshuurta wax soo saarka oo lugu sheegay tabeelayaasha hoos ku qoran waxaa ayadana ku waajibaysa in lugu daro canshuurta furdada.

Canshuurta waxaa la saaraa ayadoo la raacayo boqolayda la sheegay sida ku hor qoran badeecad kasta oo ku taala tabeelaha 6 , sidoo kale canshuurta waxaa la aruuriayaa markii alaabta laga saaro furdada iyo alaabta laga soo saaro gudaha dalka waqtiga badeecadaas ka baxayso warshadda.

**Tabeelaha 6aad Cshuurta Wax Soo saarka Gudaha**

| No | Noocyada badeecadda | Boqolayda |
|---|---|---|
| 1. | Alaabta warshaduhu soo saareen | 2% |
| 2. | Badeecadaha beeraha | 2% |
| 3. | Kaluun iyo aargoosato | 2% |
| 4. | Iyo wixii kaloo badeeca ah | 2% |

- **Boqolayda kor lugu sheegay waxaa wax laga dhimay cashuurta wax soo saarka warshadaha oo laga dhigay 1%**
- Markii alaab la mid ah kuwa dalka laga soo saaro la soo dajiyo, 3% ayaa ku waajibaysa, lacagtana waxaa la bixinayaa intaan laga saarin furdada waana cashuur cusub si loo difaaco wax soo saarka warshadaha gudaha.

## 2.3.6 Ujuurada Maxkamadaha

Dacwad kasta oo madani ah oo la keeno maxkamadda horteeda waxaa laga qaadayaa ujuuro lugu magacaabo ujuurada maxkamadda – sharci Lr 109 oo ku taariikhaysan 14-November-1970 qodobadda u dhaxeeya 1 ilaa 6 waxay cadanyaaan baaxadda iyo faahfaahinta kiisaska iyo ujuurada ay ka bixinayaan dadka dalbaday inay kiiskaas maxkamaddu eegto ama dhageysato. Kiisaska ay keensadaan wakaaladaha dowladdu, waaxaha, iyo dowladaha hoose kama qaadayso ujuuro maxkamaddu marka ugu horaysa, laakinse waxaa laga qaadayaa marka kiiska ayaga loo xukumo.


**Cutub 3: Cashuurta Furdada/Cashuurta Ganacsiga Caalamiga ah**

Cashuurta Furdada waxaa laga qaadaa badeecadaha ka soo dega Dalka ama laga dhoofiyo. Saldhiga Cashuurtu wuxuu yahay Sharci Lr .1 oo taariikhdii uu soo baxay tahay 31 Maarso 1961, Sharcigu wuxuu sheegayaa in ay jirto Waaxda Furdooyinka oo katirsan Wasaaradda Maaliyada sida ku qoran Qodobka 2 ee sharciga. Sharcigu wuxuu ogolyahay in Cashuurta Furdadu noqoto mid Madax-tiris ah iyo mid ku salaysan qiimaha alaabta, waxaana wax lagu saari karaa, wax laga deyn karaa ama wax lagaga bedeli karaa xeer sharci. Sharciga wuxuu ka kooban yahay 43 Qodob.

Puntland waxay ku shaqaysaa Cashuurta madax-tiriska ah illaa waqtigii la asaasay1998 laakiin sanadihii u danbeeyey waxaa jirey iskuday dhawr ah oo lagu daraasadeynayey Cashuurta qiimaha ku salaysan oo loo isticmaalo qiimaha guud ee badeecadaha iyo nidaamka iswaafajinta taarifada caalamiga ah oo ay samaysay, Hay'adda Ganacsiga Caalamiga ah (WTO).

Dowladda Puntland waxay jeceshahay in ay u gudubto Cashuurta qiimaha ku salaysan.

Fig: 2



**3.1 Sharciga /Furdada-Qodobada 22-29**

**Qodobka 22 Denbiga kontrabaanka**

1. Qof kasta;

a) Oo isagoo og haysta alaabo, ama si kasta ha ahaatee lagu helo in uu qaadayo, meesheedii ka wareejinayo, dhiganayo, qarinayo ama si kastaba u haysta alaabo uu isku dayayo in ka khayaameeyo madaxda Furdada si uusan u bixin wax kasta oo Cashuurtu tahay.

b) Kan isagoo og lagu helo khiyaamo kasta oo la xiriirta la dhuumashada Cashuurta bixin ama Sharciyada wax u xadadaya ee Furdada arimaha la xiriira soo dejinta, xamuul ka rogista, bakhaar geynta, gaarsiinta, qaadida, xamuul rarida, iyo alaab dhoofinta.

c) Kan isagu doon, markab rar ku qaada ama badeeco wuxuu masuul ka noqonayaa in lala wareego sida ku qoran Sharciga Furdada haddii lagu helo fal ah in uu tirtirona waxay sidoo kale u kordhinaysaa in lala wareego, waana danbiile koontarabaan, denbi kasta oo uu galayna wuxuu masuul ku mutaysanayaa in lagu xukumo ciqaab aan ka yarayn sadex jeer ama wax ka badan toban jeer cadadkii Cashuurta ahaa oo uu ka bixin lahaa alaabta, dhammaantood alaabtii lagu galay denbigana waa lala wareegayaa.

1) Qof kasta oo lagu helo arintaas waa la xirayaa waxaana haynaya sarkaal kasta haddii aan lagu soo deyn damiin, Afartan iyo sideed saac gudahood oo ayan ku jirin waqtiga looga baahanyahay safarka meesha uu ku xiran yahay illaa maxkada awooda u leh in ay xukunto laga geynayo iyadoo la marinayo sida sharciga ah.

**Article 23 La wareegida Markab ama Diyaarad**

Hadii markabkasta ama dayuuradkasta oo ku jira dalka gudihiisa ama badihiisa ayan u hogaansamin amar kasta oo sharci ah oo uu bixiyo sarkaal kasta, waa la daba gelayaa alaab kasta oo dusha laga tuuro ama wax la gaarsiiyo si loo baajiyo in lagu qabto ama daliilkeedii kontarabaan la tirtiro, markabkaas ama dayuuradaas waa lala wareegayaa.

**Qodobka 24 Koontarabaan aad u weyn**

1) Haddii qof ku mashquulo in uu galo danbi kasta oo ka soo horjeeda sharciyada Furdada uu hubaysan yahay, waxaa lagu xukumayaa danbi Furdo oo uu masuul ka ahaa toban jibaar Cashuurta badeecad kasta oo uu danbi ku galay, waxaa kaloo iyana u raacaya xarig ay mudadiisu ugu yartahay hal sano uguna badantahay sadex sano.
2) Haddii qofkaasu uu u isticmaalo denbigaas hub uu dooanayo in uu wax ku dhaawaco ama rabo in uu dhaawaco sarkaal kasta oo xafiiskiisa jooga ama shaqadiisa gudanaya wuxuu masuul ka noqonayaa in loo raaciyo ganaaxa lagu sheegay Cutub 1 ee Qodobkaan mudo dheeraad ah oo ah xarig aan ka badanayn toban sano.
3) Markii danbi kasta oo ku qoran Sharciyada Furdada ay galaan sadex qof ama dad ka badan oo ujeeddadaas ku shirkoobey, ganaaxa denbi kasti kama yaraanayo labo jibaar ciqaabta ugu yar, qofkastina wuxuu masuul ka noqonayaa mudo uusan xabsigiisu ka badnayn labo iyo toban bilood ama ganaaxa ama xariga lagu sheegay denbiga hadba kii badan.
4) Haddii qof oo lagu xukumay denbi kasta oo ku qoran sharciyada Furdada oo qofkaas hadda ka hor lagu xukumay danbi uu ka galay Sharciyada Furdada, ganaaxa la saarayo qofkaas iyadoo la eegayo danbigiisa labaad kama yaraan karo lix jeer jibbaar Cashuurtii laga qaadi lahaa badeecadda danbiga lagu galay, iyo danbi kasta oo uu galay oo ka danbeeyey denbiga labaad wuxuu masuul ka noqonayaa in lagu daro mudo xarig ah oo aan ka badnayn labo sano.

**Article 25 Damaanad**

1) Marka qofkasta la xiro ama la hayo iyadoo aan la hayn warqadii xabsi xalaalaynta denbi la xiriira cashuuraha furdada lagu qabtayna aan lagu mutaysan xarig oo markii xabsiga la geyn lahaa la bixiyey damaanad, qofkaas waxaa lagu siidaynayaa damaanad.
2) Ka hor inta qofka aan la horgeyn maxkamad, waa in ay damaanada bixiyaan saraakiisha Furdada ee awooda u leh. Damaanadu Kama yaraan karto sadex jibaar ganaaxa ugu badan denbiga iyadoo loo fiirinayo waxa loo xiray ama loo hayey.
3) Qodobkani waxba uma dhimayo awooda maxkamad kasta ama madaxdii kale ee damaanada bixisa.

**Qodobka 26 Gaadiidka lala wareego**

1) Hadii gaadiid nooc kasta uu yahay loo isticmaaloo danbi ka hor imanaya Sharciyada Furadad, waa lala wareegayaa haddii uusan kan gaadiidka lihi ku qancin maxkamada awooda u leh inaan gaadiidkaas loo isticmaalin oo uusan ku jirin ujeedada lagu galay danbigaas iyo in qiimaha alaabta ayan u dhigmin qiimaha gaadiidku leeyay.
2) Markabkasta oo culayskiisu ka badan yahay labo boqol iyo konton tan waxaa sii dayn kara sarkaalka ku shaqada leh markuu ku qanco in mulkiilaha markabku uu raacayo amarkasta oo ay bixiso maxkamada awooda u lihi.

**Qodobka 27 Xaraashida waxa lala wareegay**

Markii alaab ama gaadiid lala wareego sida ku qoran Sharciga Furdada, alaabtaas ama gaadiidkaasu wuxuu noqonayaa hantida dawlada waana la xaraashayaa sida habkooda lagu sheegay xeerarka uu sameeyey Wasiirka Maaliyadu.

**Qodobka 28 Ciqaab guud**

Markii qof lagu xukumo danbi kasta oo ka soo horjeeda Shirciyada Furdada kaasoo aan lahayn ciqaab cayiman,wuxuu masuul ka noqonayaa in lagu xukumo ciqaab aan ka yarayn Sh.So.200 kana badnayn Shs so.1,200 ama xarig aan ka yarayn bil kana badnayn toban bilood, ama labada ciqaabood oo la isku daray.

**Qodobka 29 Laaluush**

1) Haddii qofkasta u balanqaado ama siiyo abaal marin dhogor ah ama lacag ah, si toosan ama si aan toos ahayn sarkaal si uu u sameeyo ama u baabi'yo falkasta oo si kasta ula xiriira xafiiskiisa sarkaalkaas ama shaqada, qofkaas wuxuu masuul ka noqonayaa ganaac aan ka yarayn So.shs. 1,000 oo aan ka badnayn So.shs.2,000, haddiise falkaas ama tirtiridaas la codsaday lagaga dhamaysto in lagu lunsado dakhli madaxda Furdada waxay ku keenaysaa qofkaas in uu Masuul ka noqdo in lagu xukumo xarig aan ka yarayn lixbilood kana badnayn sideed bilood ama ganaax aan ka yarayn So.shs. 1000 kana badnayn So.shs, 3,000.
2) Sarkaal kasta oo aqbala abaalmarintaas, ama markii loo balanqaaday abaalmarintaas ku fashalmay in uu u sheego madaxda ka saraysa shaqada waa laga eryayaa, haddii dakhli lumay ka dhasho falkaas ama tirtiridiisa waxaa u dheeraanaya in lagu xukumo xarig aan mudadiisu ka yarayn lix bilood kana badnayn sadex sano.

**Qodobka 40aad Xeer Nidaamiyaal**

Wasiirka Maaliyaddu waxuu soo saari karaa xeer nidaamiyaal si uu u xoojiyo, u hagaajiyo ama u sahlo dhaqan gelinta sharciga , isagoo aan ku xad gudbayn waxa hoos ku qoran oo ay ka mid yihiin:

a) Xaaladaha dhoofinta ku meel gaarka ah iyo qiimeenta canshuurta badeecadaha dib loo soo dajinayo.
b) xaaladaha soo dajinta ku meel gaarka ah iyo qiimeenta canshuurta laga bixinayo badeecadaha dib loo dhoofinayo
c) waajibaadka mulkiilaha, kabtanada , wakiilada, iyo dadka kala ee ku hawlan imaatinka , warbixinada , rarida , soo dajinta , hab maamulka kuwa fuulaya ama kuwa ka soo dagaya , ka raadinta dadka markabka dushiisa , diyaaradaha , baabuurta iyo guryaha ama dhismayaasha waa wayn, awoodaha loo siiyay jiheenta , xiridda ama haynta dadka ku yimaada maraakiibta , diyaarad kasta iyo baabuur kasta ama wixii kale oo gaadiid ah .
d) Aasaasidda iyo ka shaqeenta baakhaaradda iyo barxadda furdadda oo la dhigo lagana qaado badeecadda iyo shuruudaha iyo hab maamulka ay raacayaan dadka ka shaqeeya ama isticmaalaha bakhaaradaas.
e) Ganacsiga xeebaha
f) Ganacsiga gudbaaya
g) Soo dajinta iyo dhoofinta badeecadaha
h) Soo dajinta iyo dhoofinta iyadoo la istticmaalayo Boostada
i) Awoodaha, shaqooyinka iyo waajibaadka saraakiisha oo ay ku jiraan awoodda ay dadka ku baaraan , maraakiibta , dayuuradaha , baabuurta iyo dhismayaasha ama meelaha kale , awoodooda loo siiyay inay ku hagaan , kuna xiraan ama kuna hayaan dadkaas ama alaabtaas
j) La wareegidda badeecadaha , maraakiibta , dayuuradaha ama baabuurta lugu helo danbi ama canshuur la cararka sharciyada furdada.
k) Qoraalada la aruurinaayo iyo ujuurada ay bixinayaan dadka ku xiran howlaha furdada.
l) Warqadaha canshuurta lugu balan qaado iyo rahaamadaha kale , shuruudaha la xiriira kuwaas iyo la wareegi dooda, sii wadi dooda ama dhaqan galintooda
m) Badeecadaha la ilaawo , iyo hab maamulka ku saabsan ayaga

n) Saacadaha la furayo xafiisyada furdada iyo waqtiga ay imaanayaan saraakisha, ujuurada laga bixinayo waqtiga dheeraadka ah ama shaqada dheeraadka ah iyo kharashyada kale ee aan caadiga ahayn.

o) wakiilada alaabta saara

### 3.2 Sharciga Taarifada

Sharcigani wuxu bixinayaa habraaca furdada oo ku saabsan badeecadda kala saaristeeda, qiimaha la canshuuri karo iyo canshuur dhaafka alaabta soo degta iyo kuwa dhoofa .

xeerka sharci oo Lr 5 , kuna taariikhaysan December , 1968, Wuxu ka kooban yahay 30 qodob oo si faahfaahsan u kala qeexaya dhamaan wixii la xiriira arrimaha Taarifadda.

Taarifada furdada Puntland waxay ku salaysan tahay taarifo loo yaqaan (Golaha iskaashiga Furdooyinka) oo xaruntoodu tahay Brussels.

Taarifadu waxay u qaybsantaa 21 qaybood oo u sii kala baxda qayb hoosaadyo ah 99 cutub, qayb kasta waxay faahfaahinaysaa koox badeecad ah oo dabeecadoodaha markii hore lugu sii qeexay hordhaca qayb kasta (Qoraalo lugu macneeyay).

mabda'a Taarifadu wuxu yahay kala saarista badeecadaha , mid kasta oo badeecad ahna waxa lugu sheegay marxaladeeda iyo qaybteeda. Qaybaha waxaa lugu macneeyay sida soo socota:

### 3.2.1 Qaybaha Badeecadaha

| T/t | Faahfaahinta |
|---|---|
| 1 | Xoolaha nool, badeecadaha xoolaha ka yimaada |
| 2 | Badeecadaha Khudaarta ah |
| 3 | Saliidaha iyo xayraha ka yimaada dhirta iyo xoolaha iyo badeecadahooda duxda ah , saliidaha la cuni karo ee la diyaarshay iyo shamaca laga sameeyo xoolaha ama dhirta |
| 4 | Cuntada qasacadeesan, sharaabka la cabo , Khamiirka , khalka , tubaakada , |
| 5 | Badeecadaha macdanta ka soo jeeda |
| 6 | Badeecadaha Kiimakada ah iyo wixii warshad la xiriira |
| 7 | Caaga, iyo alaabaha Plastic-ga ah iyo wixii rabar ka samaysan |
| 8 | Haragga , saanta, boorsooyinka iyo wixii la mid ah |
| 9 | Loox iyo wixii loox ka soo jeeda , Dhuxusha looxa iyo wixii kale oo ka samaysan |
| 10 | Wixii warqad ka samaysan iyo alaabta laga sameeyo warqadda |
| 11 | Dhar iyo wixii dhar ka samaysan |
| 12 | Kabo, koofiyado, dallado , ubax iyo wixii loo isticmaalo madaxa bini aadamka |
| 13 | Alaabta dhagaxa ka sameesan , darada , shamiitada iyo wixii muraayado ka sameesan |
| 14 | Bulkaatiga , dahabka , dhagaxaan qaali ah iyo wixii kaloo la mid ah |
| 15 | Bir iyo wixii bir ka soo jeeda |
| 16 | Matooro iyo qalab matoor, koronto iyo qalabkeeda iyo wixii la xiriira |
| 17 | Baabuur , dayuurado , iyo qalabkooda, maraakiib iyo wixii kale oo qalab gaadiid la xiriira ah |

| | |
|---|---|
| 18 | Okoyaalayaal, qalabka sawiradda lugu qaado , kuwa wax lugu duubo,mitirada cabirka , qalabka qalniinka , saacadaha , qalabka musikada , rikoorada, danabka iyo qaybahooda la xiriira |
| 19 | Hubka, rasaasta iyo qalabkooda |
| 20 | Alaabo wax soo saar oo kala duwan ah |
| | |
| 21 | Qalabka farshaxanka , uruurinta alaabta qadiimka ah (antiques) |

### 3.2.2 Qiimaha La Canshuuri karo

Qiimaha la canshuuri karo ee badeecaddu waa qiimaha caadiga ah ee badeecadda la sheegay oo la macne ah dhamaantood khidmadaha la xiriira iibka iyo gaarsiinta badeecadaha ilaa dekadda ama meesha ay ka soo galayso dalka iyo iib saameeya xaalad tartan oo buuxda oo ka dhaxaysa iibsade madax bannaan iyo iibiye madax bannaan taariikhda alaabta la soo hubiyay.

Qiimeenta sicirka caadiga ah wuxuu yahay dhamaan khidmadihii soo raacay iibka , meeshii lugu kaydinaayay iyo soo gaarsiintii badeecadda ilaa dekadda ama meesha kale ee ka soo gasho dalka waxaana ka mid ah :

a) Nooliga , caymiska , khidmadaha, dulaalka iyo raridda
b) Dhamaan khidbadaha kale, canshuuraha iyo kharashka dibadda kaga soo dhacay oo ku xiran iibka.
c) Qiima dhamis loo sameeyay
d) Sicir dhimis loo sameeyay wakiilka beeca , waxaa iyadana loo qaadanaya inay ka mid tahay qiimaha la canshuuri karo.
e) Qiimaha la canshuuri karo ee badeecadda waxaa ka mid ah kunteenarada gudaha ku jira iyo kuwa dibadda iyo baakadaha guud ahaan , markii qiimaha kunteenarada iyo baakaduhu dheer yihiin qiimaha badeecadda waxay yeelanayaan canshuur gooni ah.

### 3.2.3 Hababka wax loo qiimeenayo

a) Qiimaha wax is dhaafsiga: waa marka qaan sheegadka loo isticmaalayo in lugu qiimeeyo qiimaha furdada, hadii shuruudaha loo isticmaalayo qiimaha wax is dhaafsiga la aqbalo, qiimaha furdada wuxuu noqonayaa sicirka ku qoran qaan sheegadka badeecadda marka sua'aalo laga waydiiyo, kaasuna wuxuu noqonaya qiimaha saafiga ah ee sicirka, camiska, nooliga "CIF"taasoo la macnaha ah dhamaan khidmadihii kaga soo dhacay dibadda oo la xiriira iibka in lugu daray. si kasta ha ahaatee , waa shay asaasi ah in la xaqiijiyo intaan la aqbalin qaan sheegadka ;

i. Dhamaan xogta uu ka kooban yahay qaan sheegadka la sheegay in ay sax yihiin iyo inay waafaqsan yihiin xeerarka la xiriira.
ii. inuu yahay qaansheegadka dhab ah
iii. inuu buuxiyo rarkaasi su'aalo kuu muujinaya ;
   - magaca qofka ku qoran qaan sheegadka iyo cinwaanka uu deggan yahay
   - Tilmaamaha tusmada rarka sida tirada , nooca caalamadda iyo miisaanka iyo IWM.
   - Shuruudaha lagu soo iibiyay, lacag bixinta, meesha laga soo gaday iyo meesha lagu dajinayo.

Marka qaan sheegadku leeyahay alaab kala duwan oo sicirro kala duwan leh qayb kasta sicirkeedu waxaa loo muujinayaa si gooni ah, hadiise qiimaha qaan sheegadku ku tusaayo lacag qalaad, waa in loo baddalaa Shillin Somali iyadoo la isticmaalayo sarrifka rasmiga ah ee boqolayda dhabta ah oo uu ka joogu maalintaas marka hubinta alaabtu bilaabato.

**b) Liiska qiimaynta**

Arrinka ah, hadii uusan suura gal ahayn in la qiimeeyo qiimaha furdada iyadoo la raacayo habka qiimaha wax is dhaafsiga, ha noqoto qaan sheegadka oo aan la helin ama marka qiimaha ku qoran qaan sheegadka aan la aqbali karin, qiimaha ku yaal liiska qiimeenta furdada ayaa la isticmaalayaa.

**b) habab kale oo qiimeynta lagu sameeyo**

Haddii qiimaha qaan sheegadka aysan qeexeen waxyaalaha ku qoran habka 1aad iyo 2aad qiimaha alaabta isku eg ama isku dhow waxaa laga soo qaadanayaa in loo isticmaalo qiimaha is dhaafsiga ama liiska qiimeeynta furdada. Alaabta isku eg macnaheedu wuxuu yahay badeecad laga soo saaray dal isku dal mid ah oo nooc kasta iskugu eg iyo alaabo isku mid ah oo wax kasta iskaga ekeen laakin iskaga eg dabeecadaha iyo waxa ay alaabtu ka kooban tahay oo awood u siinaysa in laga qabto shaqo isku mid ah.

*fadlan xusuuso* , hadii qiimaha furdada aan lugu qiimeeyn hab kasta oo ka mid ah kuwa la soo sheegay waxaa lugugala talinayaa inaad u sheegto Agaasimaha Guud ee Furdooyinka si uu u xaddido qiimaha alaabta.

**3.2.4 Canshuur dhaaf**

Alaabta soo socota waa laga dhaafay canshuurta soo dajinta sharuudaha la sheegay awgood;

a. Alaabta ku magacaaban saldanad dibadeed ama madax dowladeed oo timaada Dalka oo ku salaysan wax is waydaarsi.

b. Alaab ama gaadiid ku magacaaban Diblumaasiyiin ama qunsullo loo soo magaacabo Dalka si is waydaarsi ku salaysan. Alaabaha looga baahan yahay asaas bilow ah ee diplumaasiyadeed iyo xafiisiyo qunsulo , gaadiid iyo alaabo kale oo saraakisha isticmaasho si ku salaysan wax isku waydaarsi.

c. Alaabta iyo baaburka ku magaacaban wakiilada, saraakiisha iyo khubaradda hayadaha caalamiga ah , wakaaladooda gaarka ah iyo hay'adaha kale oo calamka ah ayadoo la raacayo heshiis qalinka lugu duugay si sharci ah.

alaabta iyo baabuurta ay sida rasmiga ah u isticmaalaan hayadaha qaramada midoobay , wakiiladooda gaarka ah ama hayada kale oo caalami ah iyo alaabta iyo gaadiidka looga baahan yahay in lugu fuliyo mashaariicda ay ka fulinayaan gudaha Dalka ayagoo raacaya heshiis si sharci ah qalinka lugu duugay, marka laga reebo in si aad ah loo fahmo ruqsadda ku qoran hishiis si sharci ah loo badalay, hal baabuur saddaxdii sanaba loogu talagalay khubaradda lala hishiiyay oo dowladdo dibadeed siiyaan mushaarka ama hay'ado caalami ah , oo ah barnamij lugu fulinayo tageero farsamo oo laba dhinac ah dalka Puntland. Canshuur dhaafka waxa bixinaya Wasiirka Maaliyadda oo ogolaansho horay haysta.

Furdadu waxay u fasaxaysaa iib ama xaraash alaabo ama baabuur lugu soo dajiyay canshuur dhaaf , oo loo isticmaalay u jeedadii loo bixiyay mid aan ahayn oo, waxaana laga bixinayaa canshuurtii soo dajinta ku wajbtay ayadoo lugu saleenayo qiimaha shayga ama baabuurka waqtiga la iibinayo ama la xaraashayo.

c) alaabo qof leeyahay sida , qalab guri , radio, rikoor , camero camera vedio, projector (8mm), hub, computer iyo machineka harqaanka , alaab guri , alaab xirfadeed , aalad xirfadeed iyo qalab, oo aysan ku jirin baabuurka ku magacaaban qofka daganaashaha ka qaadanaya dalka sabab kasta oo ay tahay bishardi in alaabtaas la isticmaalayo oo aysan ka badnayn wax la xiriira waxa qofka xaaladda qofka khuseeysa.

Alaabta waa lugu soo dajin karaa rar gooni gooni ah muddo lix bilood ah marka laga bilaabo taariikhda uu yimi dalka. Canshuur dhaafkaas waxaa bixin kara madaxda furdada marka loo soo gudbiyo codsi ay ku dhan yihiin liiska alaabta la soo dajiyay rar ama dhowr rar iyo sidoo kale shahaadadii dagidda oo ay bixisay dowladda hoose ama document u qalma.

d) Wixiii rakaab ku magacaaban oo ah camero ,vedio camero , makiinad harqaan , computarada gacanta , gogol iyo qalab gacanta lugu sito iyo xoogaa buugaag ah iyo sariir iyo miis , bishardi in alaabtas la isticmaalayo oo aysan ka badnayn xaaladda qofka khuseeysa

e) Dharka, loo isticmaalo tiyaatarada in la suro, laxanka iyo musikada jilayaasha iyo heesayadu sitaan , qalab loo isticmaalo madadaalada, waxaa la siinayaa canshuur dhaaf markii madaxda furdada loo soo gudbiyo liiska alaabada ay sitaan ku cadahay.

f) Alaabaha loo isticmaalo diinta islaamka oo loo soo diro guddiyada diinta islaamka iyo bulshada dalka joogta

g) Faafiino iyo alaabo kale oo si toos ah loogu deeqo macaahidda dhaqanka ama hayadaha oo loo isticmaalo ujeedo cilmi ama dhaqan

h) Muunadda ( sample) alaabo oo ah mid aan si toos ah looga faa'ideesanayn

i) Faafino, xusuus qorro, calendar, posters, taariko, albums, bugaagta kitaaliga wax sharxa iyo liis qiime oo lugu qaybinayo lacag la'aan si loogu xayasiiyo dalxiis ama ganacsi.

j) Tiimbare, warqad tiimbareesan, qoraal bank, iyo alaabo dayn loogu talagalay.

k) alaab si toos ah u soo dajiso dowladdu ama ay iibsatay markii ay soo dagtay , intaan furdada laga sii dayn ka hor. taasoo uu canshuur dhaafkeedu bixinayo marka kaliya oo uu ogolaanshaha ka soo saaro Wasiirka Maaliyadda.

l) alaabta looga baahan yahay in lugu habeeyo ayaxa daraasadiisa oo loo isticmaalayo olole lid ku ah ayaxa iyo ololo lugu baab'binayo kaneecada

m) Deeq iyo macaawino nooc kasta oo ay tahay oo u socda dad abaari heshay

n) lugaha caaga ah iyo gaari yoolada dadka curyaanka ah.

o) Alaabaha loo isticmaalo si u gaar ah indhoolayaasha oo ay soo dajiso hayad ku caawinaysa ama dib wax u baraysa indhoolayaasha ama hayad ku xiran iyaga.

p) Matoorada iyo qalabkooda iyo wixii markab lugu sameenayo calankasta ha sitee

q) xayawaanka marabiga ah lab ama dhadig oo caano laga maalo iyo xoolaha loo isticmaalo beeraha

r) dhirta nool iyo dhirta kale , jirridda iyo buruqda bataatada , abuur loo xushay xero ama meelaha beeraha guryaha , bacrinta iyo duni oo si gaar ah loogu isticmaalo beerta , raashin loo soo dajiyay si toos ah oo beer lugu asaaso gaar loogu isticmaalo beeraha.

s) Qalab xirfad kullumaysi laakin aan ahayn qalabka si sportiga loogu kulumaysado.

t) Bakhaarada maraakiibta oo gaarka u ah rakaabka iyo baxrida oo si gaar ah u isticmaalaan inta socodka lugu jiro iyo inta markabku dekadda joogo ama baabuurku wadda saaran yahay oo ay siiyaan xad u go'an ay u ogolaadaan madaxda furdada.

u) Alaabta baakadaha ah iyo baakada kasta oo loo baahdo in lugu raro qudaarta iyo mooska la dhoofinayo oo ruqsadeedu ay bixiyaan madaxda furdada.

v) Dhalooyin, sanaadiiq, qasacado iyo konteenaro kale oo loogu talagalay cunto qasacadeesan oo dalka laga dhoofinayo oo ruqsadda lugu bixinayo oo ay leeyihiin madaxda furdada.

w) shidaalka iyo xayrta lagaga shaqeeyo:

   1) maraakiibta maraysa ama ka shaqeeysa xuduuda badaheena ka baxsan
   2) dayuuradaha maraya meel dibadda ah oo ay ku jiraan kuwa sameeya istaagid dhaxe ku samaynaya dalka .

x) Naxashka iyo sanaadiiqda lugu rido dadka dhintay oo laga dhoofinayo dalka iyo ubaxyada la saaro . canshuur dhaafkaas waxaa bixinaya madaxda furdada marka ay u soo gudbiyaan qoraal madaxda arrintaas shaqada ku leh.

y) badeecadaha la cadeeyay in asalkoodu dalka yahay , canshuur dhaafkaas waxaa la siinayaa mulkiilaha alaabta ama kan ka socda wax dhoofinaya iyadoo la raacayo fasaxa furdada dhoofka ee la soo gudbiyay. waxaana shardi ah in alaabtaas dib looga soo dajinayo Puntland muddo hal sano ah oo ka bilaabata taariikhda ka muuqata documentiga.

### 3.2.5 Hab maamulka

Dul ka eegidda habka furdada dekadda ku taal wax looga saaro

1. Imaatinka Markabka: manfiska xamuulka ee markabka yimaada waxaa loo geeyaa qaybta kontroosha manafeeska isagoo ay la socdaan warqadihii rarka oo qofwalba lahaa.
2. Hubinta: furdadu waxay warqad ku qortaa badeecadda laga soo dajiyay markabka oo la dhigay dekadda.
3. hogaan sanaanta: qaybta kontroosha manafeeska, markii ay hesho warbixnta warqadda ku qoran ee hubinta waxay is eegtaa qofkasta warqadiisa rarka oo la socotay

manafeeska rarka. Hadii farqi jiro qaybta hubinta waxaa loo tilmaama inay samayso warqad kale oo hubineed.

4. Aqbalaad: qaybta kontroosha manafeeska waxay aqbashaa warqadda tirinta ee hubinta, waxayna u gudbisaa qaybta qiimaynta.
5. Kala saarista iyo xisaabinta canshuurta: qaybta qiimaynta markii ay hesho warqadda waxay diyaarisaa bulleeto furdo.badeecadda waa lakala saaraa ayadoo la raacayo tarrifada oo leh canshuur cayiman oo laga qaado. Canshuurta furdada waa la isku geeyaa ayadoo la raacinayo curaarihii ku wajibay badeecaddii soo dagtay.
6. Dib u xaqiinjinta xisaabadka: qaybta xisaabadku waxay dib u eegtaa boqolayda tarrifada la isticmaalo inay sax tahay waxayna dib iskugu gaysaa canshuurihii iyo curaarihii kale ayadoo xaqiijinaysa in cadadka isku gaynta laga bixiyay alaabtii la soo dajiyay ay sax tahay.
7. U hogaansamidda: buleetada waxaa dib loogu celinayaa qaybta kontroosha manafeeska oo ayadu eegaysa isku gayntii la sameeyay ayadoo la raacayo tiradii horay loo aqbalay. hadii ay kulli sax yihiin alaabtii la soo dajiyay waxaa la bixiyaa fasaxa ay ku aadaan Bankiga si ay lacagta ugu bixiyaan.
8. Lacag bixinta: soo dajiyaha ama wakiilkiisa waxaa la siiyaa nuqul buleeto oo ay ku qoran tahay lacagta uu bixinayo , markaasuu wuxuu isku diyaarinayaa inuu lacagta ku bixiyo xisaabta bankiga dowladda
9. Sii dayn: soo dajiyihu wuxuu ula yimaadaa bulleetadii oo wadata warqad lugu cadaynayo in uu lacagtii bixiyay, sargaalka qaybta hubinta oo asagu sameeya hubinta u danbaysa iyo in la is barbardhigo warqadda iyo alaabta ku qoran wuxuuna u oglaadnayaa in alaabta lala baxo.
10. la bixid : alaabtii iyo warqadihii ay ku qornayd ayaa loola yimaada ciidanka Police-ka oo jooga iridda oo ayana sameeya warqad intaan la ogolaan in baabuurka alaabta rarka sida uu ka baxo dekadda.

**Habka la rabo in loo gudbo oo la soo jeediyay**

Habka iyo hab maamulka furdooyinka casriga ah waxaa loo sameeyaa hab ay masuuliyaddu saaran tahay mulkiilaha iyo wakiilkiisa inay u soo gudbiyaan furdada marka ugu horaysa cadayn ay ku faahfaahsan tahay alaabaha ay rabaan inay so dajiyaan ama dhoofiyaan. Furdada oo isticmaalaysa inay isku gayso istiraatijadda maamulka khatarta ah , qiimaynta khatarta howlaha iyo hubinta documentigooda , waxay kaloo ay awoodda inay samayso go'aan aad looga warqabo oo laga ilaalinayo rarka in loo isticmaalo khiyaano ku salaysan in dakhli la lunsado , in daroogo la soo dajiyo , in hub la soo dajiyo ama alaabo kale oo la mamnuucay.

**Habka fasaxaada cusub ee la soo jeediyay**

1. Imaantinka Markaba: manafeeska xamuulka ee markabka waxaa loo gaynayaa qaybta kontroosha manafeeska asagoo ay la socdaan biilashii rarka ee qof walba lahaa.
2. Keenidda cadaynta iyo documentiga ku lifaaqan: Soo dajiyaha/dulaalka waxay qoraan cadaynta alaabta. Cadayntaas oo ay ka mid tahay tirada , faah fahinta , qiimaha iyo badeecaddii asalkeedii iyo sidoo kale faahfaahinta ku saabsan kan soo diray iyo kan loo soo diray. document ku lifaaqan oo ay ka mid yihiin warqaddii rarka qoraaladii soo diridda iyo qaansheegadka ( tan waxa mar kale loo soo hormarinayaa in laga dhigo Document maamul oo mid kaliya ah (SAD) mustaqbalka iyadoo ay weheliso kala saaris taarifo ,canshuur iyo curaaro oo isku geeyay soo dajiyuhu ).
3. Kala saarista canshuurta iyo xisaabintooda: qaybta qiimaynta waxay heshaa cadayn, waxayna xaqiijisaa dhamaan documentiyada iyo warka la bixiyay . Bulleto furdo ayay diyaarisaa iyadoo la raacayo cadaynta. Badeecadda waxaa loo kala saaraa ayadoo la raacayo taarifo leh boqollay canshuur cayiman oo laga qaadayo. Canshuurta furdada waa la xisaabinaya iyadoo la raacinayo wixii curaara ahaa oo ku wajibay alaabta la soo dajiyay.
4. Lacag bixinta: soo dajiyaha ama wakiilkiisa waxaa la siiyaa nuqul buleeto oo ay ku qoran tahay lacagta uu bixinayo, markaasuu wuxuu isku diyaarinayaa inuu lacagta ku bixiyo xisaabta bankiga dawladda.
5. Qiimaynta khatarta documntiyada: dhamaan dokumentigii iyo cadayntii lacag bixinta ayaa loo keenayaa qaybta kontroosha manafeeska oo iyaduna dib u eegaysa dhamaan dokumentiga in loo hogaansamo waxayna isku eegaysaa warqaddii ay diyaariyeen dekaddu. Sargaalku wuxuu xisaabta ku darsanayaa taarikhda soo dajiyaha, faraqa ka jira warqadda iyo uu dhici karo kontrabaan iyadoo la raacayo boqolayda tarifada ee badeecadda iyo in la sameeyo go'aan khatar ku salaysan, si loogu diro rarka hubinta ama loo sii daayo badeecadda.

6. Hubinta: sargaalka hubinta wuxuu samaynayaa hubin asagoo raacaya tilmaamihii ogaanayana in faraq jiro iyo in kale. Warbixin buu ka diyaarinayaa wixii laga ogaaday alaabtii iyo tiradii. Dhamaan wixii siyaada ah ama badeecad aan la caddayn waa la haynayaa waxaana warbixin la siinayaa qaybta kontroosha manafeeska.
7. U hogaansanka: qaybta kontroosha manafeeska waxay eegaysaa warbixinta hubinta waxayna isku eegaysaa qoraalka caddaynta. Hadii uu jiro wax dheeri ah/alaab aan la caddayn wuxuu diyaarinayaa liis wuxuna amrayaa in la "badalo caddaynta" halkaas oo kala saaris kale, isu gayn xisaabeed, xisaabin ciqaab iyo lacag bixin ka dhacayso. Hadii uusan faraq jirin warqad fasaxaad ah ayaa loo diyaarinayaa.
8. Sii dayn: hadii aan faraq la helin inta lugu jiray hubinta ama ka dib marka la xaqiijiyay lacag bixinta, badalka ka dib qaybta kontroosha manafeeska waxay diyaarinasyaa amar lugu sii daynaayo, ka dib markaas soo dajiyihu waa qaadan karaa alaabtiisa si uu ogola baxo alaabtiisa waana kala bixi karaa dekadda.
9. la bixid: alaabtii iyo warqadihii la socday waxaa loo keenayaa ciidanka ilaalinta canshuuraha oo ayagu dayrka jooga oo iyana sameeya warqadda, ka hor intaan la ogolaan in gaariga alaabta sida uu dekadda ka baxo.
10. Xaqiijinta sii daynta: dokumentigii oo dhan waxaa loo celinayaa qaybta xisaabadka oo iyadu dib u eegaysa boqolayda tariffada la isticmaalay inay sax tahay, dibna iskugu gaynaysa canshuurtii iyo curaaraha kale si loo xaqiijiyo in isku gaynta cadadka la bixiyay uu sax yahay . Hadii ay jirin wax faraq ah markaa ka dib soo dajiyihu wuxuu isku diyaarinayaa inuu bixiyo lacagta dheeraadka ku ah.

**Prof. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas**

**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

## HABRAACA FURDADA WAX LOOGA SIIDAAYO

## (Customs Clearance Procedure)

**Qaybta Kantaroosha Manafeeska**

1) Sarkaalka Furdada waxaa loo keenaa Manafeeska iyo

↓

**Rugta gacansiinta Furadada**

2.) Soodejiyaha/wakiilka wuxuu tegayaa rugta Furdadu wax ku caawiso si uu u dhamaystirto cadaynta iyo warqadaha ku lifaaqan

↓

**Qaybta qiimaynta.**

3. (a) Cadaynta waa la xeraynayaa oo la aqbalayaa Lr. taxane ah oo u gaara ah ayaa la siinayaa. b) Sarkaalka qiimayntu wuxuu diyaarinayaa Buleetada. c) Madaxa qiimayntu wuxuu ogolaadaa in lacagta labixiyo. d) Faahfaahinta cadaynta iyo Buleetada waxaa la gelinayaa diiwaanka.

↓

**Qaybta Xisaabinta iyo dib u xaqiijinta**

4.Waxay dib u eegaysaa boqoleyda taarifadda, waxay isu geysaa cadadka Cashuurta iyo Curaaraha isagoo xaqiijinaya in cadadku sax yahay.

↓

**Bangiga**

5. Wuxuu ka qabanayaa lacagta wuxuuna siinayaa warqadda lacag qabashadda.

↓

**Maamulka Khatarta/qaybta u hogaasanka**

6. Waxay dib u eegaysaa qoraalada iyo taariikhadii hore ee soo dejiyaha, wuxuuna u dirayaa hubinta.


| | |
|---|---|
| **Wasaaradda Maaliyada Waaxda Furdooyinka (Ministry of Finance Department of Customs )** | **Qaabka Cadaynta Furdada (Custom Declaration Form)** |

| Habraaca Furdada (Customs procedure) | Soo dejin (Import) | Diiwaangelinta Laysanka License Registration | Taariikh Imaatin/bixid Arrival/Departure | Warqada rarka Lr. (Way bill No.) | Calaama (Mark) |
|---|---|---|---|---|---|
| | Dhoofin (Export) | | | | |

| Mulkiilaha/wakiil Owner/agent | Cinwaan (Address) | Tell No: |
|---|---|---|
| | | |

| LINE | Faahfaahinta Badeecadda (Description of Goods) | Tiro (Qauntity) | Halbeeg (Unit) | Wadar (Total) |
|---|---|---|---|---|
| 1 | Shaarar | 10 cts | 4Dersin | 40Dersin |
| 2 | Shidaal | 100 fuusto | 200 ltrs | 20000ltrs |
| 3 | Timir | 200 cts | 15 kg | 3000kg |
| 4 | | | | |
| 5 | | | | |
| 6 | | | | |
| 7 | | | | |
| 8 | | | | |
| 9 | | | | |
| 10 | | | | |
| 11 | | | | |
| 12 | | | | |
| 13 | | | | |
| 14 | | | | |
| 15 | | | | |
| 16 | | | | |

| | | |
|---|---|---|
| Anigoo ah-------------------------------Waxaan cadaynayaa in aan ahay Mulkiilihii/wakiilkii loo igmaday badeecadda halka ku qoran in warka ku qoran sax yahay. (I --------------------------------declare that I am the owner/agent of the listed goods that all the information provided is true and correct) | Saxiisa (Signature) | |
| | Taariik (Date) | |


Qaabka Cashuuraha Puntland
Cashuuraha Berriga
Furdada
Cashuuraha Toosan
Cashuuraha Dadban
Cashuurta Soo dejinta
Cashuurta dhoofka
Cashuurta diiwaangeli
Cashuurta Boollada
Cashuurta Wadamari
Cashuurta Gadida
Cashuurta Wax soo
Ujuurada Maxkamadaha

